



DAWLADDA GALMUDUG
SOOMAALIYA

SIYAASADDA QAYBTA
BIYAHA, FAYA-DHAWRKA
IYO NADAAFADDA(WASH-
ka)

JUNE, 2021

TUSMO :

TUSMO :	2
XURUUFU EREYO LAGA SOO GAABIYEEY	6
ARAR	9
MAHADNAQ.....	10
HORDHAC.....	11
QAYBTA 1AAD	14
LAFA-GURISTA	14
XAALADDA.....	14
1. Guudmar	14
Khayraadka Biyaha.....	15
Nadaafadda iyo Fayadhowrka.....	18
WASH-ka iyo Tas-hiilaadka Caafimaadka.....	22
WASH-kaiyo Iskuullada	23
Maamulka Qaybta WASH-ka	23
Tiknolojiyadda iyo Ikhtiraacaad (Hal-abuur Cusub)	25
Ku-lug-lahaanshaha Ganacsiga Gaarka Loo Leeyahay	25
Doorka ay Ururrada Bulshaada Rayidka ah ay ku leeyihiin QaybtaWASH-ka	26
Maaliyadsiiinta Qaybta WASH-ka	27
Korjoogtaynta QaybtaWASH-kaiyo Nidaam Bixiya Digniin Hore	27
QAYBTA 2AAD	30
QAABKA GUUD EE SIYAASADDA	30
DALIILKA TILMAAMAYA IN BAAHI LOO QABO	30
HIMILADA	30
HAWSHA	30
YOOLKA.....	30
UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA.....	30
QIYAMKA IYO MABAA'DIIDA AASAASIGA AH.....	31
CUTUBKA	33
ADEEG-BIXINTA BIYAHA.....	33
1.1 Ujeeddooyinka siyaasadeed ee gaarka ah waa:	34
1.2 Hawraarta Siyaasadeed ee Biyo-qaybinta Magaalooyinka.....	35
1.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:	35
1.2 Hawraarta Siyaasadeed ee Biyo-qaybinta Miyiga	35

1.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	36
1.3 Hawraarta Siyaasadda ee Qaashada Hababka u Roon Dadka Saboolka ah	36
1.3.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	37
1.4 Hawraar Siyaasadeed –wanaagga bulshada oo loo maro tixgelin bulsho iyo mid deegaameed	37
1.4.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	37
1.5 Hawraarta Siyaasadeed ee Tayada Biyaha	38
1.5.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:	38
1.6 Hawraarta Siyaasadeed – Waaridda adeegga oo loo maro lahaanshaha bulshada	39
1.6.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	39
1.7 Hawraarta Siyaasadeed ee dhiirrigelinta in biyaha lagu nadiifiyo laguna keydiyo guryaha ...	40
1.7.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed	40
CUTUBKA 2	42
NADAAFADDA IYO	42
FAYADHOWRKA.....	42
3.2 Hawraarta Siyaasadeed ee Ururinta Qashinka	43
3.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed	44
Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	45
3.4 Hawraar Siyaasadeed ku saabsan Maaraynta Qashinka Adkaha ah (Qashinka laga helo goobaha Caafimaadka/ <i>bio-medical</i> iyo kan Halista ah)	45
3.4.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed	46
3.5 Hawraarta Siyaasadeed ee Xakamaynta Dulinka:	46
3.5.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	46
3.6. Hawraar Siyaasadeed – Dhiirrigelinta musqulo guri kasta yeesho, iyada oo loo marayo Fayadhowrka Dhammaystiran ee ay Bulshadu Hormuudka u tahay (CLTS).....	48
3.6.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	48
3.7 Hawraar Siyaasadeed oo ku saabsan kor-u-qaadista nadaafadda iyo fayadhowrka, iyada oo loo marayo fayadhowr dhammaystiran oo ay iskuulladu hormuud ka yihiin:.....	49
3.7.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed	49
CUTUBKA 3	49
KU-XIRIDDA WASH-ka QAYBAHA KALE	49
4.1 Ujeedooyinka Siyaasadeed ee Gaarka ah:	50
4.2 Hawraar Siyaasadeed: Ku-xiridda qaybta WASH-ka Qaybaha kale.....	51
4.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed	51

CUTUBKA 4	51
MAALIYADSIINTA QAYBTAWASH-ka	51
4.1 Ujeeddooyinka siyaasadeed ee gaarka ah waa:	52
4.2 Hawraarta Siyaasadeed ee Maaliyad-siinta ee 1aad: Waaridda adeegga iyada ooloo marayo qaybsashada kharashka	53
4.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	53
CUTUBKA 5	54
KU-LUG-LAHAANSHAHA GANACSIGA GAARKA LOO	54
LEEYAHAY	54
5.1 Ujeeddooyin siyaasadeed oo gaar ah:	55
5.2 Hawraarta Siyaasadeedee ku saabsan Ganacsiga Gaarka Loo Leeyahay: Ganacsiga gaarka loo leeyahay oo la kobciyo, si ay u bixiyaan adeegyada WASH-ka.....	56
5.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	56
CUTUBKA 6	58
NIDAAMKA MAARAYNTA XOGTA QAYBTA WASH-ka.....	58
6.1 Ujeeddooyinka Siyaasadeed:	58
6.2 Hawraar Siyaasadeed: Nidaamka Maaraynta Macluumaadka iyo Digniinta Hore	59
6.2.1 Tallaabooyin Siyaasadeed.....	59
CUTUBKA 7	61
KOBCINTA ISUDUWIDDA IYO WADA-HAWLGALKA	61
7.1 Ujeeddooyinka Siyaasadeed ee Gaarka ah	62
7.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:.....	62
QAYBTA 3AAD	64
QAABKA GUUD EE SHARCI, XEER-NIDAAMIN IYO.....	64
HAY’ADEED	64
Ujeeddooyinka gaarka ah waa:	64
Hawraarta Siyaasadeed ee Doorarka iyo Mas’uuliyadaha Hay’adaha:	65
Doorarka iyo Mas’uuliyadaha Hay’adaha	65
Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha ee Heer Federaal iyo Heer Dawlad-goboleed	65
Dib-u-habaynta Wasaaradda.....	65
Agaasinka Khayraadka Biyaha/Heerarka Dawlad-goboleedyada	66
Xarunta Saadaasha Fatahaadaha/ <i>Flood Forecasting Centre (FFC)</i>	67
Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada/ <i>Ministry of Health and Human Services</i> (MOH&HS) ee Heer Federaal/Dawlad-goboleed.....	67

Wasaaradda Arrimaha Gudaha	68
Doorarka iyo Mas’uuliyadaha.....	68
Wasaaradda Hawlaha Guud ee Heer Federal/Heer Dawlad-goboleed	69
Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga yo Horumarinta Dhaqaalaha.....	69
Wasaaradda Waxbarashada, Dhaqanka iyo Tacliinta Sare ee Heer Federaal/Heer Dawlad-goboleed.....	69
Wasaaradaha Beeraha iyo Xanaanadda Xoolaha ee Heer Federaal iyo mid Dawlad-goboleed....	70
Agaasinka Hay’adda Arrimaha Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada,	70
Golayaasha Degmooyinka ee Magaalooyinka/Dawladaha Hoose	70
Guddiyada WASH-ka ee Bulshada.....	70
Deeq-bixiyeyaasha iyo Wada-hawlgalayaasha Horumarinta	70
Ururrada Aan Dowliga Ahayn iyo Ururrada Bulshada Rayidka ah	71
Qoysaska/Reeraha.....	71
Ganacsiga Gaarka Loo Leeyahay	71
QAYBTA 4AAD	73
DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA	73

XURUUFO EREYO LAGA SOO GAABIYEEY

	Combined Drought Index / Tasmada La iskubiiriyey ee
CDI –	Abaarta
CHF	Common Humanitarian Fund / Sanduuqa Wadajirka ah ee Bani’aadamnimada
	Community Lead Total Sanitation / Fayadhowr Dhammaystiran oo ay Bulshadu
CLTS	Hormuud
	Ka Tahay
CSO	Civil Society Organization / Ururrada Bulshada Rayidka ah
EPR	Emergency Response Plan / Qorshaha Gurmada Degdegga ah
EU	European Union / Midowga Reer Yurub
	Food and Agriculture Organization / Hay’adda Cuntada iyo
FAO	Beeraha
	Flood Working Group / Koox-hawleedda Arrimaha
FWG	Fatahaadaha
	Geographic Information System / Hannaanka Macluumaadka
GIS	Dhulka
IDP	Internally Displaced People / Dadka Gudaha Ku Barakacay (Barakacayaasha)
	Information, Communication Technology / Tiknolojiyada, Macluumaadka War-
ICT	isgaarsiinta
	Inter-Ministerial WASH Steering Committee / Guddiga Wasaaradaha ka
IMWSC	dhexeeya ee
	Hagidda WASH-ka
IOM	International Organization for Migration / Hay’adda Caalamiga ah ee Socdaalka
KAP	Knowledge, Attitude, Practice / Aqoonta, Dabeecadda iyo Ku-dhaqanka
	Ministry of Education, Culture and Higher Education / Wasaaradda
MoECHE	Waxbarashada,
	Dhaqanka iyo Tacliinta Sare
	Ministry of Energy and Water Resources / Wasaradda Tamarta iyo Khayraadka
MoEWR	Biyaha
	Ministry of Health and Human Services / Wasaaradda Caafimaadka iyo
MoH&HS	Daryeelka
	Bulshada

NDP	National Development Plan / Qorshaha Horumarinta Qaranka Office Coordination Humanitarian Affairs / Xafiiska Isduwidada	
OCHA	Arrimaha Bani'aadamnimada	
ODF	Open Defecation Free/cidhibtirka bannaan ku saxarooshada	Shirkadaha
PPP	Public-Private-Partnership / /Iskaashiga Dawladda iyo loo leeyahay.	Gaarka
SDG	Sustainable Development Goals / Yoolalka Horumarka Waara	
SOP	Standard Operating Procedures / Habraacyada Jaango'an ee Hawlgalka Somalia Water and Land Information Management/ Maaraynta Macluumaadka	
SWALIM	Dhulka iyo Biyaha ee Soomaaliya	
SWAp	Sector Wide Approach / Hab Ku Fidsan Dhammaan Waaxaha	
UN	United Nation / QaramadaMidoobey	
UNICEF	United Nation Children's Fund / Sanduuqa Qaramada Midoobey ee Carruurta United States Agency for International Development / Hay'adda Horumarinta	
USAID	Caalamiga ah ee Mareykanka	

NGO	Non-Governmental Organization / Urur Aan Dawli Ahayn
WASH	Water, Sanitation and Hygiene / Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda
WHO	World Health Organization / Ururka Caafimaadka Adduunka
WSS	Water Supply System / Hannaanka Bixinta Biyaha

ARAR

Dowladda Galmaudug ee Soomaaliya ayaa Siyaasadda heer gobl ee Qaybta WASHka ee ugu horreysey dejiyey sannadkii **2021**. Siyaasaddu waxaa ay higsanaysaa in dhammaandadka ku nool Soomaaliya ay helaan biyo nadiif ah, nadaafad iyo fayadhowr ku filan.

Himilada siyaasaddu waa in ay abuurto dal uu qof waliba heli karo biyo nadiif ah oo lacabbo, qof walibana uu isticmaalo musqulo fayadhowr leh oo aydhammaan tuulooyinku noqdaan kuwa aanay Dadkoodu Bannaanka Ku Xaajo-gudan ama ku saxaroon/*Open Defecation Free (ODF)*, qof walbana uu hab-dhaqan nadaafadeed kaga dhaqmo gurigiisa, iskuullada iyo guud haan bulshada dhexdeeda. Himiladeennu waxayn ku qotontaa aaminsanaanta aan aaminsannahay in helidda biyo nadiif ah iyo fayadhowr ay helaan dhammaan dadku ay gacan ka geysaneyso yaraynta saboolnimada iyada, oo taasna lagu gaarayo caafimaadka, wax-soo-saarka iyo dakhliga oo wanaagsanaada.

Siyaasadda heer dowlad goboleed ee WASHka waxaa ay ka dhigan tahay ballanqaad ay Dowladdu ballanqaadeyso in ay sii wanaajinyso tayada nolosha dadka Soomaaliyeedgaar ahaan shacab weybaha Galmuudg. Waxaa ay bixineysaa qaab guud oo la-hawlgelayaasha Qabta WASHka iyo Wasaaradaha ay khuseyo ay u fulinayaan barnaamijyada la xiriira WASHka, waxayna Siyaasaddu ku baaqaysaa in dhammaan dadku wada helaan Biyo iyo Fayadhowr si loo xaqiijiyo Yoolalka Horumarinta ee Waara (SDGs).

Geeddi-socodka lagu diyaarinayey Siyaasadda waxaa loo sameeyey qaab ka-wada-qaybgal ah oo ay ku lug lahaayeen daneeyeyaal badan iyada oo hadafka laga lahaana yahay hubinta faahfaahsanaanta iyo aqbalidda dokumentiga. Aqoonsashada daneeyeyaasha ugu habboon, gaar ahaan si loo diyaariyo qabyo-qoraalka Siyaasadda ayaa ahayd tallaabo u muhiim aha guud ahaan hawsha.

Waxaan ku faraxsannahay in aan Siyaasaddan u soo bandhigno dadka Soomaaliyeed annaga ku kalsoon, rajeyneyna in haddii si taabba gal ah loo hirgeliyo Siyaasaddaay noloshooda ka dhigi doonto mid sidii hore ka wanaagsan kana caafimaad badan, iyada oo sii wanaajineysa wax-soo-saarkooda iyo ka-qaybgalkooda ay ka-qaybgalayaan horumarinta dalkooda.

Mahadsanidiin,

H.E Hon. Mr. mohamud abdi ahmed karshe

Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyoKheyraadka Biyaha

Dowladda Galmudug Soomaaliya

MAHADNAQ

Siyaasaddii ugu horreeysey ee Qaybta WASH-kawaxaa ka soo baxay geeddi-socod dheer oo adag oo wadatashi xooggan, oo kooxo loo xilsaaray hawlo kala gaar-gaar ah, ay daraasado faahfaahsan iyo macluumaad ururin oo ay si buuxda uga wada-shaqaynayeen ugana wada-qaybgaleen dhammaan daneeyeyaasha.

Guddiga Hagidda WASH-ka ee Wasaaradaha KaThe *Inter-Ministerial WASH Steering* Dhexeeya /Committee (IMWSC) oo ka kooban Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, Wasaaradda Waxbarashada, Dhaqanka iyo Tacliinta Sare, Wasaaradda Arrimaha Bani'aadamnimada iyo Maaraynta Aafooyinka, Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-u-dhiska iyo Guriyaynta, Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa aad ugu mahadcelinaya qof kasta oo qayb ka qaatay in lagu guulaysto dejinta Qorshahan. Waxaan ka mahadcelinaynaa dadaalka wadajirka ah ee ay bixiyeen dhammaan wasaaradaha kala duwan, UNICEF iyo daneeyeyaasha kale. Mahad gaar ah waxaa leh xubnaha IMWSC oo hoggaaminayay geeddi-socodka gebi ahaantiiba min bilow ilaa dhammaad oo si aan la soo koobi karin u fududeeyey wada-tashiyadii heer dowlad-goboleed.

Waxaan jeclaan lahayn in aan ka mahadcelinno taageeradii farsamo ee uu bixiyay Mudane Khadar Maxamuud Axmed oo ka socday *IRS Consulting* oo hormuud u ahaa gebi ahaanba geeddi-socodkii diyaarinta Siyaasadda Qaybta WASH-ka, oo ahaana qofkii kaalinta ugu weyn ku lahaa dejinta iyo qaabaynta Siyaasadda. Waxaa mahaddaas mid la mid ah loo celinayaa UNICEF oo bixisay taageeradii maaliyadeed iyo farsamo ee lagamamaarmaanka u ahaa dejinta Siyaasadda iyo sida ay u qoondeeysay maaliyaddii looga baahnaa Dejinta Siyaasadda.

Ugu dambayn, waxaan jeclaan lahayn in aan ka mahadcelinno dadaalladii ay bixiyeen dhammaan hay'adihii iyo shakhsiyaadkii wax ku biiriyay diyaarinta dokumentigan. Kuwaas oo ay ka mid yihiin Wasaaradaha iyo Hay'ahaha Dawladda ee heer Federaal iyo heer Dawlad-goboleedba, Lahawlgalayaasha Horumarinta, Hay'adaha Qaramada Midoobay, NGO-yo, Bulshada Rayidka ah iyo Ganacsiga gaarka looleeyahay.

HORDHAC

Siyaasaddu waxay rajeyneysaa in dhammaan dadka ku nool Soomaaliya ay helaan biyo nadiif ah, nadaafad iyo fayadhowr ku filan. Himilada siyaasadu waa in ay abuurto dal uu qof waliba heli karo biyo nadiif ah oo la cabbo, qof walibana uu isticmaalo musqulo fayadhowr leh ay dhammaan tuulooyinkuna noqdaan kuwa aanay Dadkoodu Bannaanka Ku Xaajo-gudan/*Open Defecation Free (ODF)*, qof walbana uu hab-dhaqan nadaafadeed kaga dhaqmo gurigiisa, iskuullada iyo guud haaan bulshada dhexdeeda.

Siyaasadda dowladda Galmuudg ee WASH-ka waxaa ay ka dhigan tahay ballanqaad ay Dawladdu ballanqaadeyso in ay sii wanaajinayso tayada nolosha dadka Soomaaliyeed. Himilada siyaasaddu waa in dhammaan dadka Soomaaliyeed loo sahlo in ay helaan biyo bed qaba, nadaafad iyo faydhowr ku filan. Himiladeennu waxaa ay ku qotontaa aaminsanaanta aan aaminsannahay in helidda biyo nadiif ah iyo fayadhowr ay helaan dhammaan dadka ay gacan ka geysaneyso yaraynta saboolnimada iyada oo taasna lagu gaarayo caafimaadka, wax-soo-saarka iyo dakhliga oo wanaagsanaada.

Siyaasaddu waxaa ay bixinaysaa/tilmaamaysaa qaab guud oo la-hawlglayaasha Qaybta WASH-ka iyo Wasaaradaha ay khuseyso ay u fulinayaan barnaamijyada la xiriira WASH-ka waxaana ay ku baaqaysaa in dhammaan dadku ay wada helaan Biyaha iyo Fayadhowrka si loo xaqiijiyo Yoolalka Horumarinta ee Waarta (SDGs).

Wasaaradaha Qaybta WASH-ka oo iskaashi dhow la leh daneeyeyaasha ugu habboon waxaa ka go'an in ay dadka Soomaaliyeed ay si ammaan ah ay ku helaan adeegyada biyo nadiif ah iyo fayadhowr oo ay weheliso kor-u-qaadista nadaafadda. In si habboon loo kobciyo adeegyadan waxaa ay kaabeysaa koboca dhaqaalaha bulshada, waxaa ay kor u qaadeysaa tayada nolosha waxaana ay sii wanaajineysaa xaaladda caafimaad ee dadka.

Siyaasaddan waxaa ay soo bandhigeysaa qaab guud oo loo sii wanaajinayo tayada nolola dadka ku nool Soomaaliya iyada oo hubineysa in la helo biyo nadiif ah iyo in la sii wanaajiyo fayadhowrka iyo in la dhiirrigeliyo qaadashada hab-dhaqannada nadaafadda ee heer shakhsi, qoys iyo bulshoba, xarumaha caafimaadka iyo iskuullada. Mabaa'diida ku qoran siyaasaddan waxaa ay waafaqsan yihiin Yoolka 6aad ee Horumarka Joogtada ah (SDGs) ee cusub ee hanweynida ku tilmaaman, oo ah in la hubiyo in dadka ay helaan iyo in si waarta loo maareeyo biyaha iyo fayadhowrka.

Geeddi-socodka lagu diyaarinayey Siyaasadda waxaa loo sameeyey qaab ka-wada-qaybgal ah oo ay ku lug lahaayeen daneeyeyaal badan iyada, oo hadafka laga lahaana yahay hubinta faahfaahsanaanta iyo aqbalidda dokumentiga. Aqoonsashada daneeyeyaasha ugu habboon, gaar ahaan si loo diyaariyo qabyo-qoraalka Siyaasadda ayaa ahayd tallaabada koowaad oo muiimka u ahayd guud ahaan hawsha.

Siyaasaddu waxay ka kooban tahay afar qaybood. Qaybta 1aadi waxay ka hadlaysaa xaaladda waqtigan jirta iyo fayadhowrka. Qaybta 2aadina, waxay bixineysaa qaabka guud ee Siyaasadda oo ka kooban toddobadan cutub ee soo socda:

1. Cutubka 1aad: Bixinta Adeegga Biyaha,
2. Cutubka 2aad:Nadaafadda iyo Fayadhowrka
3. Chapter 3: Ku-xiriddaWASH-ka Qaybaha Kale
4. Cutubka 4aad:Maaliyadsiinta QaybtaWASH-ka
5. Cutubka 5: Ka-qaybgelinta Ganacsiga Gaarka Loo Leeyahay
6. Cutubka 6aad: Hannaanka Maaraynta Macluumaadka ee Qaybta WASH-ka
7. Cutubka 7aad: Isduwidida iyo Wada-hawlgalka Qaybta WASH-ka

Qaybta 3aad waxaa ay ka munaaqashooneysaa qaabka guud ee hay'adeed iyada oo koobeysa doorarka iyo mas'uuliyadaha hay'adaha iyo daneeyeyaasha muhiimka ah ee Qaybta WASHka; halka, qaybta 4aad ay ka hadlayso dib-u-eegista Siyaasadda.

QAYBTA 1AAD
LAFA-GURISTA
XAALADDA

1. Guudmar

Dadka Galmuudg si degdeg ayay u kordhayaan. Dadka guud ahaan dalka ayaa lagu qiyaasay in ay 12.3 milyan1ahaayeen sannadkii 2014 (49.3% lab ahiyo 50.7% dheddig ah). Degmooyinka magaalooyinka ah ayaa u koraya si aan horey loo arkin iyada, oo dad badani miyiga ka soo guurayaan oo ay soo degayaan magaalooyinka, taas, oo ah sababta keentey in ay qaar badan oo ka mid ah dadka ku soo ururaan gudaha iyo hareeraha magaalooyinka waawayn. Dadku waa dad aad u dhallinyar, iyada oo 45.6% ay da'doodu ka hooseysa 15 sano jir, halka 75% ay da'doodu ka hooseyso 30 sano jir. Kooxahahalista weyn ku jira waxaa ugu muhiimsan 2.4 milyan oo carruur ah, kuwaas, oo ay da'doodu ka yar tahay 5 sano jir iyo in ka badan 3 milyan oo ah haweenka ku jira da'dii dhalmada. Reer-guuraaga ayaa ah afar-meelood meel wadarta dadka Soomaaliyeed waxaana jira qiyaastii 1.1 milyan (8.6% wadarta dadweynaha), oo dadka gudaha ku barakacay ah (barakacayaal) oo badankoodu ku nool yihiin hareeraha magaalooyinka (PES 2014). Tilmaamahan ay dadweynuhu leeyihiin ayaa raad mug weyn ku leh, meel ay kartida maamulka dowladeed uu u leeyahay in uu bixiyo adeegyada bulshada oo ay ka mid yihiin adeegyada Biyaha iyo Fayadhowrka iyo Nadaafaddu ay xaddidan tahay, meel misana uu gargaarka horumarinta iyo bani'aadamnimaduba ay hoos u sii dhaceen, oo ayna jiraan deegaanno ay si joogto ah uga jiraan colaado, afooyin dabiici ah iyo xaalado degdeg ah sida abaar iyo cudurro faafa oo dillaaca.

Dagaalka tobanaanka sano ka socday daraaddii ayaa qaar badan oo ka mid ah tilmaamayaasha la xiriira biyaha, caafimaadka, nadaafadda iyo fayadhowrka ay yihiin kuwo aad u liita, oo ay helidda biyo nadiif ahi ay taagan tahay 10% (daahrooggii warbixintii JMP-2017 – SDG) iyada oo ay gobolladu ku kala duwan yihiin. Shubanka dadka ku dhacaayaa ah 23% waana cudurka ugu badan ee ku dhaca carruurta marka laga sootago caabuqyada ku dhaca nef-mareenka. 10% keliya ayaa dadweynaha ku gacmo dhaqda biyo iyo saabuun. Sannadkii 2015, saamiga hooyooyinka u dhinta sababo la xidhiidha uurka iyo dhalmada ayaa lagu qiyaasay 32 ka mid ah 1,000 ee nolol ku dhashaba, laakiin weli waa midliidatamarka la barbardhigo Kenya ama Itoobiya (353) kala ahaa sanadkii 2015ka. Heerka carruurta ka yar 5-sano jirka ee dhinta ayaa ah 37 oo ka mid ah 1000 nolol ku dhashaba sannadkii 2015ka, markala barbardhigo Kenya

(49) iyo Itoobiya (59). Cimriga dadka ay gaaraan ayaa lagu qiyaasayaa 53 iyo 56 sano labka iyo dheddiga, sida ay u soo kala horreeyaan. Waxaa dalka ku nool 202,600 carruur ay nafaqo-xumo ba'ani hayso.

Kartida hay'adaha dawladdu ay leeyihiin ayaa soo wanaagsanaatey, laakiin dafiicnimada ka jirta hannaanka ayaa culeysyo badan ku ah hubinta in si loo siman yahay loo helo adeegyada WASHka, oo tayo iyo bedqab leh oo kharashkoodana la iska bixin karo. Waxaana soo hoosgelaya habab isuduwidada oo jilicsan iyo xaddidnaanta sirtoonka loo adeegsan karo geeddi-socodka go'aan-qaadashada; tiro yaraanta ba'an ee shaqaale farsamo, oo leh aqoontii iyo kartidii loo baahnaa; maaliyadaha oo aan dadka ku filnayn, oo misana si joogta ah aan loo helin iyo nidaamkawax-soo-iibsiga iyo sahayda oo daciif ah.

Siyaasadda dowladda Galmudug ee qaybta WASH-ka ayaa lafaguris gun-dheer ka bixineysa xaaladda WASHka ee Galmudug. Qorshaha Istiraatiijiga ah ee WASHka ayaa guudmar ka bixinaya Qaybta WASHka sida hoos lagu faahfaahiyey.

Khayraadka Biyaha

Galmudug waa deegaan ay biyuhu ku yar yihiin oo uu naafeeyay dagaal sokeeye, oo ay kaabayaashiisu burbureen, maamulka qaybta WASH-ka, oo xaddidan iyo helitaanka shakhsiyaad xirfad u leh oo yar. Biyaha waxaa loo aqoonsan yahay in ay yihiin badeecad dhaqaale iyo mid bulsho maaddaama ay si weyn ugu tiirsan yihiin wax-soo-saarka xoolaha iyo beeraha ee Soomaaliya iyo maaddaama haweenka uu culeys weyn ka haysto biyo-aroorka, iyaga oo xilliga jiilaalka badanaa u socda ilaa 10 km si ay biyo u soo helaan.

Ceelasha la qodo ayaa laga helaa 80% biyaha guryaha lagu isticmaalo, laakiin biyaha dhulka hoostiisa ku jira waa ay fog yihiin (100 ilaa 300 mitir marka laga bilaabo oogada dhulka) taas oo soo-saarista biyaha ka dhigeysa mid aad qaali u ah. Macaadinta ku milantay biyaha ayaa biyaha ka dhigasya kuwo aad u xaraar, oo ay milixdu ku badan tahay. Inkasta, oo ay muhiimad weyn leeyihiin oo kharashka qodistuna uu sarreeyo, aqoon ilaa xad yar ayaa loo leeyahay cilmiga biyaha dhulka hoostiisa ku jira ee dalka (Balint Z. et al, 2011).

Helidda biyo nadiif ah ayaa yar guud ahaan dalka. Sida uu tilmaamay Barnaamijka Korjoogteynta Wadajirka ah ee WHO-UNICEF *Joint Monitoring Program* (JMP) 2017- ee warbixintii Daahroga SDG, helidda biyaha tubooyinku wadaan ee dalka oo dhan waxaa ay tahay 19%; halka, helidda biyaha aasaasiga ah ee dalka ay taagan tahay 40%. Arrinta sida weyn u muuqata waa sida hadda biyaha loo helo oo muujinaysa in waxqabadada WASH-ka

ee sanadaha socdey ay ku guuldarreysteen in ay si la-taaban karo oo joogto ah u sii wanaajiyaan helidda biyo nadiif ah oo sii wanaajiya ilaha biyaha.

Biyaha dhulka guudkiisa yaalla waxaa ugu waawayn webiyada Shabeelle iyo Jubba oo ah ilaha ugu weyn ee sida weyn u kaabi kara beeraha ee Koonfurta dalka. Taasna waxaa ay sababtay in deegaannada webileyda ah ay xuddun u noqdaan badi colaadda 27kii sano ee u dambeeyey socotey. Maaddaama in badan oo biyaha webiyada ka mid ah ay ka yimaadaan buuraleyda Itoobiya, waxaa loo baahan yahay heshiis ay dalalka xuduudahu ka dhexeeyaan ay ka yeeshaan si qaab taabagal ah loogu maareeyo khayraadka biyaha iyo sidoo kale si loo diyaariyo hab la isu duwey oo looga digo fatahaadaha.

Daraasaynta iyo khariidadaynta khryaadka biyaha dhulka hoostiisa ku jira ayaa xaddidnayd tan iyo markii sahama dhammaystiran ay khubarradii cilmiga biyaha dhulka ku takhasustay ee Talyaaniga ahayd ay daraasad ku sameeyeen 1970-meeyadii. Sahama cilmiga biyaha dhulka ku jira oo keli keli ah ayaa la sameeyey si ay u hagaan ceelal la qodayay laakiin kuwaasi ma ahayn kuwo si la isuduway looga wada shaqeeyey oo xog aad u yar ayaana la isku biiriyay.

Biyaha dhulka guntiisa yaalla ee Soomaaliya waxaa ay isugu jiraan kuwo dhow oo laga helo deegaannada webileyda ah oo ku darsammaan biyaha dhulka korkiisa yaalla, iyo biyaha dhulka guntiisa yaalla ee badanaa loo haysto in ay yihiin kuwo gundheer ee meelaha kale laga helo. Marka laga soo tago dhulka webileyda ah, biyaha ku biira kuwa dhulka guntiisa ku jira aad bey u yar yihiin, waxaana saami ballaaran oo ka mid ah biyaha dhulka guntiisa yaalla waxaa ay ka soo maaxaan biyaha dhulka hoostiisa yaalla ee dalalka deriska nala ah ee Kenya iyo Itoobiya. Biyaha dhulka guntiisa yaalla ee Soomaaliya ilaa xad waa kuwo tayadoodu ay liidato, taas oo ay sabab u tahay milixda, oo ku badan. Mid ka mid ah sababaha ugu waawayn ee macaadintu ugu badan tahay waa in biyaha ay hadda is-taabanayaana ama horey isu soo taabteen macaadin si fudud ugu milmi karta biyaha. Intaa waxaa dheer, biyaha ku darmaya biyaha dhulka guntiisa fadhiya waa kuwo ka yar intii loo baahnaa waxaana ay ku kooban yihiin ilo deegaanno xaddidan ka yimaada; qaar badan oo ka mid ah biyaha dhulka guntiisa fadhiya gebi ahaanba kuma soo darsammaan biyo kale waxaana ay ka kooban yihiin biyo hore, oo aad u xaraar oo macaadin badani ay muddo hore ku milantay.

Meelaha ay biyaha ka helaan xoolo-dhaqatada waa kuwo aan dadka ku filnayn waxaana ay taasi sababtaa nabaadguurka deegaanka taas oo ku timaadda daaqsinta saa'idka ah ee hareeraha meelaha biyaha hadda laga helo. Sannado aan yarayn gudahooda, ayaa tiro badan oo ceelal-riig ah ay qodeen qandaraaslayaal amar ka haysta dowlado Muslim ah oo kala duwan oo hoos tega daladda Ururka Golaha Islaamka/ *Organization of Islamic Council* (OIC). Waxaa ay u muuqataa in qodista ceelashaasi ay ahayd hawl aan la isuduwin, lana khariidadeyn, oo ka-qaybgalka dadweynuhuna uu aad u yaraa. Waxaa jira warbixinno sheegaya in qaar ka mid ah ceelashan aan lagu qalabayn bamka biyahasoo saara.

Biyo-yaraan ayaa badanaa dhacda waqtiga jiilaalka markaas oo dadwaynuhu ay ku tiirsanaadaan keliya, labada webi ee aan gurin (Jubba iyo Shabeelle) iyo biyaha dhulka ku jira(ilaha biyaha ee joogtada u socda, ceelasha riigga lagu qoday, ceel-gacmeedyada aan gurin). Waxqabadka caadi ahaan ay hay'adahu uga jawaabaan abaaraha waa in ay maaliyad ku biixyaan biyo-dhaamin loo sameeyo deegaannada biyaha aan joogtada u helin. Waxaa la qiyaasayaa in malaayiin doolar lagu bixiyey waxqabadyada noocan ah ee xalalka muddada gaaban ku wajahanbaa socdey 27kii sano ee la soo dhaafey. Haddii maaliyadda la bixinayo meel la isugu keeni lahaa oo laguna kharash-gareyn lahaa xalal waara oo biyo joogto ah lagu helo, waxaa aad u yaraan lahaa baahida loo qabo biyo-dhaamin.

Sida uu tilmaamay Barnaamijka Korjoogtaynta Wadajirka ah ee WHO-UNICEF *Joint Monitoring Program* (JMP) 2017- ee warbixintii Daahroga SDG, dadka magaalooyinka ku dhaqan ee hela biyaha waa 70%, waxaana helidda biyaha dhuumaha ay wadaan ee magaalooyinka ay hadda tahay 45%. Haseyeeshee, qaar badan oo ka mid ah dadka deggan magaalooyinka iyo deegaannada ku dhegan magaalooyinka (oo ay ka mid yihiin Barakcayaasha) waxaa ay ku tiirsan yihiin biyo-iibiyeyaal yaryar oo dadka biyo tayadoodu hoosayso kaga iibiya qiime sarreeya, taas oo markaa dadka saboolka ahi ay biyaha ku bixiyaan ilaa shan laab qiime ka badan kan dadka kale; in kasta oo ay jirto xaqiiqda ah in dalkan ay magaalooyinka si degdeg ah u korayaan, taas oo ka dhalatay barakaca gudaha ee ay sababeen colaadaha iyo abaaraha.

Badi goobaha biyaha ee la khariidadeeyay iyo sahamadii tayada ee la sameeyay waxaa ay tilmaamayaan in biyaha ay ku soo wasakhoobaan ilaha ay ka yimaadaan, halka laga soo qaato/dhaansado iyo halka lagu isticmaalo. Ma jiro shaybaar dawladeed oo loo gudbiyo siloo eego loona korjoogteeyo tayada biyaha. Waxaa jira karti-yaraan dhinaca xeer-nidaaminta iyo hubinta tayada biyaha taas oo ay weheliso in ilaa xad uu liito fahamka sida ilaha biyuhu ay ku faddaroobaan iyo halis la xiriirta isticmaalka biyahaa. Sidaa daraaddeed sii wanaajinta tayada

biyaha waxaa ay u baahan tahay dadaal wadajir ah, ay sameeyaan hay'ado badani. Biyaha oo lagu daaweeyo koloriin ilaa xad wanaagsan ayaa looga fahamsan yahay gobollada koonfureed ee Soomaaliya, halka, Somaliland uu ku badan yahay biyo-miiraha ka samaysan marmarka (*ceramic filter*). Haseyeeshee, isticmaalka mid kasta oo ka mid ah labadan hab aad buu u hooseeyaa oo badi dadweynuhuna ma isticmaalaan hababka daawaynta biyaha ee lagula taliyo.

Nadaafadda iyo Fayadhowrka

Fayadhowrku waa arrin horumarinta la xiriirta oo aasaasi iyo muhiimba ah, taas oo si la mid ah sida arrimaha kale ee muhiimka ah ee horumarinta u baahan in si dhab ah looga fekeri si horumar joogto ah looga gaaro dhaqaalaha dalka iyo maaraynta khayraadka biyaha. Sii-wanaajinta nadaafadda iyo fayadhowrku waa waxqabad muhiim ah oo loogu baahan yahay in la sii wanaajiyo xaaladaha nololeed ee dadka si ay u gaaraan nolol dhammaystiran oo caafimaad iyo wax-soo-saar leh. Sii wanaajinta nadaafadda iyo fayadhowrku waa in wax looga qabtaa iyada oo qayb ka ah istiraatiijiyad horumarinta iskudhafan, gaar ahaanna ay la socoto istiraatiijiyadaha horumarinta biyaha maaddaama labadu ay dhab ahaan isku xiran yihiin.

Culaysyada la xiriira nadaafadda iyo fayadhowrka ee Soomaaliya waxaa ay la halmaalaan arrimo kala duwan, laga bilaabo helidda tas-hiilaadka iyo adeegyada fayadhowrka oo hooseeya iyo sidoo kale meelaha uu gaaro adeegga oo yar iyo adeegyada faydhowrka oo tayadoodu liidato ilaa jiritaan la'aanta qaabab guud oo sharci iyo mid hay'adeed. Baahida loo qabo fayadhowrku waa mid ka muuqata guud ahaan dalka.

Sida waaxda biyaha oo kale waxaa jira tiro maamullo hay'adeed oo mas'uuliyad yar ay ka saaran tahay fayadhowrka. Jahawareerka la xiriira in guud ahaan mas'uuliyadda fayadhowrka ay yeelato Wasaaradda Caafimaadka, Dawladda Hoose ama Wasaaradda ka mas'uulka ah biyaha si buuxda wax loogama qaban.

Sida uu tilmaamay Barnaamijka Korjoogtaynta Wadajirka ah ee WHO-UNICEF *Joint Monitoring Program* (JMP) 2017- ee warbixintii Daah-rogga SDG, helidda fayadhowrka aasaasiga ah waa 16%, iyada oo 11% dadwaynaha ay isticmaalaan tas-hiilaad la wadaago iyo 34% oo isticmaala tas-hiilaad fayadhowr oo aan la sii wanaajin. Nisbada dadka bannaannada ku xaajo guta waa 39% dalka oo dhan iyada oo 7% ay joogaan magaalooyinka halka 60% ay joogaan deegaannada miyiga ah.

Badi dadka Galmudug guryahooda ma laha tas-hiilaad gacmaha lagu dhaqdo. Sida uu tilmaamayo Sahankii *WASH KAP Survey* ee 2015kii, in ka yar kalabar (24%) waxaa ay haystaan tas-hiilaad guud oo gacmaha lagu dhaqdo. Gobolka ay arrintan ugu badan tahay guud ahan dalka

waa Koonfurta iyo Bartamaha oo ay nisbadu tahay 47%. Helitaanka tas-hiilaadkan waxaa ay aad ugu hooseysaa Barakacayaasha iyo bulshooyinka reer-guuraaga ah. Sida ay qabto UNICEF, tas-hiilaadka gacmo-dhaqashada ee habboon waa in ay lahaadaan biyo, saabuun iyo meel ay biyihu ku qulqulaan. In kasta oo 24% reerahu ay leeyihiin tas-hiilaadgacmo-dhaqashohaddanakeliya 10% ka mid ah waxaa ay leeyihiin biyo iyo saabuun halka 4% ay leeyihiin biyo, saabuun iyo meel ay biyuhu ku qulqulaan. Helidda tas-hiilaadka fayadhowrku waa 14%, iyada oo 2 da gobol mudug iyo Galmudud ku ala duwanyihiin dadka heli kara tas-hiilaadka faayadhowrka.

Sida ay tilmaamayaan natiijooyinkii Sahankii WASH KAP Survey, 20% dadwaynuhu ma garanayaan sida loo asturo qashinkooda. Marar intaa ka badan ayaa ay sidaas sheegeen dadka jooga Koonfurta iyo Bartamaha, deegaannada miyiga ah iyo bulshooyinka reer-guuraaga ah. Gubidda qashinka ayaa ah habka ugu badan ee loo asturo qashinka laakiin taas laftigeeda ayaa hoosaysa waxaana ay tahay 19%.

Saxarada oo si ammaan ah loo asturo, si aanay u faddarayn deegaanka, biyaha, cuntada iyo gacmaha, ayaa muhiim u ah hubinta deegaan caafimaad leh iyo ilaalinta caafimaadka dadka. Soomaaliya gudaheeda, sida loo asturo wasakhda laga soo saaro musqulaha/suuliyada waa mid aan ammaan ahayn. 20% waxaa loo isticmaalaa bacrimin ahaan, 25% waxaa wasakhda la soo saaray ay ku daadiyaan duurka, halka 10% ay waxa la soo saaray ku daadiyaan webiga. Qaababka ay bulshadu u maamusho musqulaha waa ay ku kala duwan yihiin qaybaha dalka. Wax ka yar kalabar (39%) waxaa ay soo faagaan musqulaha marka ay buuxsamaan oo isla boqollaydaas mid la mid ahna (39%) ma garanayaan sida loo maareeyo musqulaha. 20% waxaa ay door-bidaan in ay musqul kale qataan. Qayb yar ayaa iska jooga musqul la'aan (2%). In ka badan saddex-meelood meel dadwaynaha weligood ma soo faagin/qashin-bixin musqushooda. Sannado badan ayaa Barnaamijyada waxbarashada iyo war-gaarsiinta dhiirrigelinta iyo ka hortagga ah ee nadaafadda iyo fayadhowrku ahaayeen kuwa ku wajahan wax gaar ah (*ad hoc*), aan la isuduwin, gooni-gooni ah oo badanaaba wax aan ka baran mashaariicdii ka horreeyay. Gaar ahaan hababka la isticmaalo waxaa ay ku tilmaaman yihiin tababar kor ka socda iyo in xoogga la saaro waxbarashada dadwaynaha Soomaaliyeed halkii laga isticmaali lahaa habab wax ku biirinaya aqoonta deegaanka oo dhiirrigelinaya hab-dhaqannada soo-jireenka ah ee wanaagsan ee weli jira. Kala qoqobnaanta waaxaha/qaybaha (*sector siloes*) ayaa sidoo kale xaddidaysa raadka hababka fayadhowrka iyo nadaafadda bulshada ee ay waax/qayb kastaa isticmaasho.

Nooca ugu badan ee maalgelinta fadhawrka eedhammaan noocyada gargaarka ee lagu bixiyo Soomaaliya waxaa uu ahaa barnaamijyo lagu kabayo dhisidda musqulo. Inkasta oo maalgelintani ay jirtay haddana caddayn aad u yar ayaa loo hayaa raadka ay ku yeelatay kororka isticmaalka musqulaha ama fayadhowrka iyo nadaafadda oo sii wanaagsanaaday. Xaaladda waqtigan la joogo waxaa sidoo kale ay ku tilmaaman tahay mid aan waxqabadka aanu ahayn mid waara iyo in uu yar yahay is-beddelka ku yimaada hab-dhaqanka ay sida joogtada ah ay ugu dhaqmaan dadku. Habab cusub oo bulshada hoggaminteeda ku salaysan sida Fayadhowrka Dhammaystiran ee Bulshadu Hoggaamiso / *Community Led Total Sanitation, CLTS*, ayaa natiijo weyn lagu gaaray dunida oo dhan iyo Soomaaliyaba. Bulshooyinka ayaa lagu dhiirrigelinayaa in ay dib-uegis ku sameeyaan qaababka ay u xaajo gutaan iyo raadka ay ku leedahay bulshadooda. Lafaguristan ayaa waxaa ay u marayaan in ay diyaariyaan qorshe-hawleed ay bulshadoodu ku noqonayso meel aan bannaanada lagu xaajo gudan / *open defecation free (ODF)*.

Qaybta fayadhowrka iyo hannaanka bullaacaduhu u shaqeeyaan marna kama soo kabsan dhibaatooyinkii haystay 27kii sano ee ugu dambeeyey, waxaana ay u-dhug-lahaansho iyo maaliyad aad u yar ay ka heleen daneeyeyaal iyo maalgeliyeyaal kala duwan. Maaddaama aanay jirin maamul dawladeed oo bixinaysa, ama deegaan fududeeya, qashinka waxaa qaada shakhsiyaad hawshaas qabta oo kharashka uga baxana si toos ah uga qaata qoysaska ay u adeegaan. Qashinka ka yimaada tas-hiilaadka fayadhowrka ee tirada yar ee shaqeeya iyo qashinka ay soo ururiyeyaan qashin-qaadayaasha waxaa inta badan lagu shubaa togagga qalalan iyo dhulka qashinka lagu aaso iyada oo aan loo aabo-yeelin caafmaadka dadwaynaha ama xaalufinta deegaanka.

Maadaama nidaamyada bullaacadaha ee ay leeyihiin guryaha gaarka loo leeyahay ay yar yihiin ama aanay jirinba, ayaa badi dadka heli kara fayadhowr waxaa ay isticmaalaan musqulo bulshadu leedahay. Dadka meelaha kale ka soo socdaala iyo barakaca ayaa culays mug leh saaray nidaamyadii tirada yaraa ee ka jirey deegaannada magaalooyinka bannaankooda ah waxaana tas-hiilaadkii ku-meelgaarka ahaa ay noqdeen kuwo si joogto ah loo isticmaalo.

Gebi ahaanba fayadhowrka & nadaafadda deegaannada magaalooyinka bannaankooda ah waa mid ay dhibaato ka taagan tahay. Waxaa marar badan ka dillaaca cudurka shuban-biyoodka ba'an waxaana lagu guuldarraystay dadaalladii lagu doonayay in ay dawladdu ka shaqeeyso maaraynta adeegyada fayadhowrka. Ma jirto istaatiistik qaran iyo mid dowlad goboleed oo laga sameeyay heerarka qashinka ka soo baxa dalka Soomaaliya. Ma jiraan tirooyin heer qaran ah oo la hayo ku saabsan dhammaan qashinka wasakhda ah oo ay ku jiraan qashinka halista ah. Murugsanaanta qashinka ka soo baxa waxyaabaha ay dadku isticmaalaan ayaa sii kordheysa maaddaama ay is-

beddelayaan qaababka wax-soo-saarka, ay kordhayaan magaaloobidda, hawlaha warshadaha iyoadeegyada.

Guud ahaan dalka, waxaa la qiyaasayaa in wax ka yar 40% qashinka la soo saaro la qaado si loo asturo. Soo-ururinta iyo gaadiid-ku-qaadista qashinka ayaa waxaa xaddidaya helid la'aanta qalabka, dadka iyo khayraad maaliyadeed oo haysata dhammaan Dawladaha Hoose ee Soomaaliya. Si looga gudbo dhibaatan, ka-qaybgalka ganacsiga gaarka loo leeyahay ee maaraynta qashinka ayaa ku sii badanaya magaalooyinka waawayn ee guud ahaan dalka.

Qashinka halista ah iyo qashinka goobaha caafimaadka ayaa si yar loo gubaa. Waxaa si aan loo aabo-yeelin loogu daadiyaa qashin-qubka halkaas oo ay ku qasmaan qashinka kale. Tiro aad u yar oo ka mid ah magaalooyinka waawayn ayaa leh godad qashinka lagu aaso. Qashinka soo baxa badidiisu waxaa uu ku dambeeyaa goobaha qashinka lagu qubo halkaas oo aan qashinka la jugayninlana daboolin. Ma jiraan tiknolojiyado loo adeegsado dib-u-warshadayn (*recycling*) iyo burburinta agabka orgaanigga/asal-noolaha ah (*composting*) oo laga heli karo dalka. In xarumaha caafimaadka ee dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay aanay lahayn habraacyo lagu maareeyo qashinka halista ah iyo kan bayoloojiga ah ayaa keenaya cudurro faafa oo aan la xakamayn karin ay dillaacaan waxaana ay dhibaato caafimaad oo halis ah ku yihiin dadwaynaha.

Qashinka isbitaallada, sida qashinka waxyaabaha nool laga sameeyay ee halista ah iyo kan bayoloojiga ah, oo ay ka mid yihiin agabka caafimaadka ee la qubo isticmaalka ka dib (sida, irbadaha la isticmaalo, sariingayaasha iyo dhalooyinka daawooyinka, gacmo-gashiga, gaarsooyinka qalliinka iyo daawada taariikhdeedu dhacday ee aan la isticmaalin) ayaa iska yaalyaalla dhismooyinka isbitaallada. Maaddaama aanay jirin qorshayn ama xakamayn ku habboon maaraynta qashinka halista ah ee waxyaabaha nool laga sameeyay, ayaa aanay dadwaynuhu ka nabadgelin qashinkaas halista ah.

Maaraynta iyo xakamaynta qashinka adkaha ah iyo kan dareeraha ah, sida ka dhacdaba dalal badan oo kuwa soo koraya ah, ayaa weli ah dhibaato weyn oo ka jirta magaalo kasta oo Soomaaliya ka mid ah. Baco faaruq ah, qashinka ka soo baxa waxyaabaha guryaha lagu isticmaalo iyo bacaha qashinka oo ay ku jiraan saxarada dadka iyo cunto hambo ah ayaa ka soo laalaada geedaha ama ku daadsan hareeraha dhismayaasha aan la degganayn ama iska dhex yaalla boosaska/jagooyinka dhulka bannaan. Caagado ay ku jiraan kaadi, wasakh kiimiko ah, ooliyada matoorada iyo baabuurta oo la isticmaalay, ooliyo iyo shidaal ka qubtay kaalimada

shidaalka, iyo baabuur meelaha lagu qubay ayaa calaamad u ah qashinka halista ah ee aan si habboon loo maarayn.

WASH-ka iyo Tas-hiilaadka Caafimaadka

Tas-hiilaadka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ayaa ah goobta ugu horreysa ee daryeel lagu bixiyo, gaar ahaan dadka ku nool deegaanada miyiga ah. Waxaa ay sidoo kale muhiim u yihiin wax-ka-qabashada cudurrada dillaaca, sida daacuunka. Sidaas oo ay tahay, haddana haddii aanay jirin adeegyada WASH-ku waxaa aad u yaraanaya awoodda ay shaqaalaha daryeelka caafimaadku u leeyihiin in ay qaadaan tallaabooyin ku habboon oo looga hortago laguna xakameeyo cudurrada faafa iyo in ay bulshooyinka tusaan hab-dhaqannada wanaagsan ee WASH-ka, labadaasiba waxay si gaar ah muhiim ugu yihiin xakamaynta iyo joojinta cudurrada faafa. Haseyeeshee, ma jiraan siyaasad iyo qorshe-hawleedcad oo loogu talagalay biyaha iyo fayadhowrka ee tas-hiilaadka caafimaadka.

Ma jirto xog la isku hallayn karo sheegeysa xaaladda WASH-ka ee tas-hiilaadka caafimaadka. Soomaaliya dhexdeeda, kama jiro hab la tijaabiyay ama loo aqoonsaday in uu yahay habka ugu wanaagsan; sidaa daraaddeed, waxaa loo baahan yahay in la diyaariyo hab ku habboon oo ka shaqeeya deegaanka. Khayraadka oo yar iyo in aanay caddayn waxa noqon kara qaababka ugu wanaagsan ayaa waxaa ka dhashay in goobaha laga fuliyo barnaamijyada hubinaya in tas-hiilaadka caafimaadku ay lahaadaan kaabayaasha ugu yar ee biyaha iyo fayadhowrka iyo in adeegyada la bixiyo ay ka mid ahaadaan kuwo lagu dhalinayo is-beddel wanaagsan oo dhinaca WASH-ka ah. Qashinka goobaha daryeelka caafimaadka, sida agabka halista ah ee lagu isticmaalay goobaha caafimaadka iyo qashinka bayolajiga ah, oo ay ka mid yihiin sahayda caafimaadka la qubo isticmaalka ka dib (yacni, irbadaha, sariingayaasha iyo dhalooyinka daawada, gacmo-gashiga, agabka lagu dhayo dhaawacyada iyo daawooyinka waqtigoodu dhacay ee aan la isticmaalin) ayaa daadsan dhismayaasha tas-hiilaadka caafimaadka. Jiritaan la'aanta qorshe ama xakamayn ku habboon maaraynta qashinka agabka halista ah ee lagu isticmaalay goobaha caafimaadka, ayaa waxaa ka dhalatay in dadwaynuhu u baylahaanaadaan qashinkan halista ah ee xasaasiga ah. Maaddaama xarumaha caafimaadka ee dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahayba aanay lahayn habraacyo ku filan oo lagu maareeyo qashinka agabka lagu isticmaalay goobaha caafimaadka iyo kan bayolajiga ah waxaa ka dhalanaya in ay dillaacaan cudurro faafa oo aan la xakamayn karin oo halisna ku ah caafimaadka guud. Gaar ahaan, ma jirto goob caafimaad oo leh hannaan qashinka lagu gubo oo ku filan.

WASH-kaiyo Iskuullada

Sannadaba barnaamijyo badan oo WASH-ka ah ayaa waxaa ku jiray qayb ku wajahan iskuullada. Haseyeeshee, waa ay yar yihiin tusaalayaasha kuwaas looga soo qaadan karo in ay ka dhasheen adeegyo joogto ah oo iskuulladu leeyihiin ama is-beddel joogto ah oo ku yimid hab-dhaqanka dadka. Noocii ugu dambeeyey oo waajahaya qaab dhammaystiran oo ah WASH-ka laga dhex sameeyo tas-hiilaadka (oo ay taageertay USAID) ayaa ay suurageli karta in ay natiijooyin ka dhashaan. Intaa waxaa dheer, in tas-hiilaad WASH-ka ah lagu daray qaybta iskuullo ardayda u roon ee ololaha ‘Ku-noqoshada Iskuulka’ ayaa laga yaabaa in ay dhaliso xiiso dheeri ah oo loo hayo iyo taageero ay helaan hawlaha WASH-ka ee iskuullada.

Maamulka Qaybta WASH-ka

Maamulka qaybta WASHka ee Dowladda waa uu dhaafsiisan yahay Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha ee waxaa uu gaarsiisan yahay hay’ado iyo daneeyeyaal kale. Qaab-dhismeedka hay’adeed ee hay’adaha qaybta WASH-ka waa kuwo inta badan khayraadkoodu

uu yar yahay taas oo keenaysa in hay’aduhu ay sidoodii hore iska ahaadaan (*institutional inertia*). Shaqaale badan iyo nidaamyo maarayn oo badan oo loo baahnaa ayaan jirin. Doorarka ay hay’adaha dawladda ee kala duwan ay kala leeyihiin ma cadda waxaana marar badan dhacda in ay isku wax ku mashquulaan. Hawlaha iyo qaab-dhismeedyada hay’adaha ayaa ah kuwo aan is-waafaqsanayn oo culaysku ku badan yahay iyada oo culays kale la sii saarayo khayraadkii ay heli kartay qaybta oo markiisii horeba yaraa.

Qaab-dhismeedka maamul, habraacyada iyo agabka taageerada farsamo ee dhammaan heerarka kala duwan waa mid aan dadka ku filnayn ama aan jirin. Waxaan jirin macluumaad habboon oo ku saabsan hawlgallada qaybta WASH-ka oo awood dadka u siisa in ay go’aanno qumman ay qaataan maamulka iyo kuwa dejiya siyaasadaha. Waa ay adag tahay in la helodiiwaan habboon oo ku saabsan shaqaalaha farsamada iyo xirfadlayaasha aqoonta u leh qaybta WASH-ka. Ma jiraan qaabab guud oo iswaafaqsan oo dhinacyada sharciga, xeer-nidaaminta iyo siyaasadda. Siyaasadaha iyo shuruucda la hayo ayaa weli qabyo-qoraal ah guud ahaan hay’adaha waxaana ay yihiin kuwo wada-jaanqaadi karin iyada oo aanay jirin qaabab guud oo loo sameeyo korjoogtayn iyo qiimayn si loo cabbiro horumarka la xaqiijiyay iyo dhaqangelinta siyaasadaha.

Ku dhowaad dhammaan hay'adaha dawlada ee la waraystay waxaa ay leeyihiin unug (qaybta WASH-ka ah) ama qof u qaabilsan arrimaha WASH-ka. Waxaa ay dhammaantood xubno ka yihiin IMWSC waxaana ay si joogto ah uga qaybgalaan kulamada IMWSC oo ay guddoomiso Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha.

Hay'adaha leh mas'uuliyadda maaraynta khayraadka si cad looma qeexin. Gobollada dowladda Galmudug ayaa leh hay'ado qaab-dhismeedkoodu aad u kala duwan yahay oo leh mas'uuliyadda iyo maaraynta biyaha. Dowladda Federaalka Soomaaliya (FGS) ayaa leh Xeerka Biyaha oo uu ansaxiyay Aqalka Sare bishii Nofembar oo hadda sugaya saxiixii Madaxwaynaha. Haseyeeshee waxaa si guud la isugu wada raacsan yahay in mudnaan la siiyo khayraadka biyaha iyo maarayntiisa.

Arrimaha nadaafadda iyo fayadhowrka si wanaagsan uguma dhex muuqdaan maamulka. Wasaaradda Caafimaadku waxaa ay leedahay waax u qaabilsan caafimaadka guud (*public health*) taas oo badanaa ah tan arrimahaas u qaabilsan dawladda laakiin si yar ayaa ay u

awooddaa in ay hoggaamiso qaybta WASH-ka. Fayadhowrka magaalooyinka waxaa loo arkaa in mas'uuliyaddeeda ay leeyihiin Dawladaha Hoose laakiin xaaladda dhab ah ee jirta waa in maamulladaas ay aaminsan yihiin in mas'uuliyaddan ay badanaa ku kooban tahay bullaacadaha (oo aanba jirin) iyo maaraynta qashinka adkaha ah. Taasna waxaa ay keentay in aanay cidi qaadin mas'uuliyadda fayadhowrka goobta la deggan yahay (*on-site sanitation*) oo ah midda ay caadi ahaan isticmaalaan ilaa 99% dadka deggan magaalooyinka.

Isuduwidada hawlaha qaybta WASH-ka waxaa badanaa loo maraa “kutlada/*cluster*”. Ilaa goor dhowayd ma jirin guddi ay Dawladdu magacowday oo hubiya isuduwidada wasaaradaha dhexdooda waxaana doorkaas badanaa loo mari jirey habka isuduwidada kutlada ka dhaxaysa (*Inter-cluster coordination mechanism*). Waxaa hadda Muqdisho laga dhisay guddi ka dhaxeeya qaybta WASH-ka, kaas oo ay guddoominayso Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha oo ay xubno ka yihiin Wasaaradda Caafimaadka, Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha, Wasaaradda Waxbarashada, Wasaaradda hawlaha Guud, Wasaaradda Qorshaynta, Wasaaradda Gargaarka iyo maaraynta Masiibooyinka iyo UNICEF taas oo ay suuragal u tahay in ay xoojiso kormeeridda iyo isuduwidada qorsheyaasha iyo hirgelinta kala dhantaalan ee waxqabadyada qaybta WASH-ka. Isuduwidada heer dawlad-goboleed, gobol iyo degmo ayaa waxaa weli maaraynaya kutlada WASH-ka (*WASH cluster*). Qaab-dhismeedka kutladaha ee heer

gobol waxaa ku badan NGO-yo si dhow ugu xiran Kutlada taas oo ay keentay maaliyadda ay ka helaan Sanduuqa Wadajirka ah ee Bani'aadamnimada / *Common Humanitarian Fund (CHF)*. Hawl-wadeennada kale ee WASH-ka waxaa ay weli yihiin kuwo aan hawshooda la isuduwin iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, Qurba-joog iyo mashaariic biyood ay bixiyeen dowlado Carab ah kuwaas oo badanaa la fuliyo iyada oo aan loo hoggaansamin jaangooyooyin ama xataa hab-dhaqan wanaagsan loo maro samayntooda.

Tiknolojiyadda iyo Ikhtiraacaad (Hal-abuur Cusub)

Waxaa muuqata in ay yar yihiin ikhtiraacaadka farsamo ee cusub ee Qaybta WASH-ka laakiin waxaa guulaha muuqda ka mid ah warshadaha yaryar ee biyaha sifeeya – hannaanka saddexda haamood ee ay keentay IOM ayaa suuragelin kara in la sii wanaajiyo in biyo nadiif ah oo la cabbi karo lagu helo deegaannada webileyda ah ee Koonfurta iyo Bartamaha dalka.

Qalabka biyaha soo saara ee ku shaqeeya tamarta qorraxda ee lagu rakibay ceelasha biyahoodu dhow yihiin iyo ceel-riigyada – adeegsiga qalab tayadiisu wanaagsan tahay ayaa ay ka dhalatay in la helo nidaamyo kharashaadka ku baxa dayactirkoodu uu hooseeyo oo si la isku hallayn karana looga helo biyo, xataa haddii la joogo deegaannada fogfog ee dalka.

Miirayaasha biyaha ee ka sameysan dhoobada la qallajiyay (*Ceramic water filters*) – Laguna farsameeyay gudaha dalka ayaa loo qaybiyay bulshooyin ku nool Gedo, Baay, Galmudug iyo SL iyada oo ay dadkuna u bogaan. Balliyada la malaasay iyo kuwa kor ka daboolan – oo ah mashruuc tijaabo ah oo ay hay'adda *Terre Solidari* ka dhiseyso PL ayaa sii wanaajiyay sida la isugu hallayn karo biyaha roobka waxaana laga helay biyo xareed ah oo lala isticmaali karo biyaha ceelasha riigga ee dhanaan si ay u noqdaan biyo la cabbo.

Ku-lug-lahaanshaha Ganacsiga Gaarka Loo Leeyahay

Nidaamyada Bixinta Biyaha/*Water Supply System (WSS)* iyo Tas-hiilaadka iyo Adeegyada Fayadhowrka oo ilaa laga soo gaaray 1991 ay dowladdu maamuleysey ayaa markaaba ahaa kuwo ciriiri maaliyadeed uu haystay oo aan dadna ku filneyn. Iyaga oo ahaa kuwo dhibaato soo gaartey oo dayactir fiicanna haysan ayaa waxaa ay noqdeen kuwo aan shaqaynin 20kii sano

ee xigey. Tas-hiilaadka WSS iyo Fayadhowrka ma helin maaliyad dowladeed iyo sidoo kale maaliyad laba-geesood ah iyo mid gaar ah oo mug leh.

Waxda ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa kobocday muddadaas waxaana ay buuxisay kaalintii dowladda iyada oo bixisay adeegyo Biyo iyo Fayadhowr. Ganacsi-abuurayaal ku noolaa qaybaha kala duwan ee dalka ayaa dhisey berkado, qodey ceelal riig gaar loo leeyahay, oo adeegyoguud ku bixiyay magaalooyinka waawayn oo ilaa xadna sii wanaajiyay hawlihii WSS.

Iskaashiga maamulka iyo ganacsatada ayaa ah xal waara oo u habboon bixinta biyaha iyo maaraynta qashinka ee magaalooyinka. Waxaa la sii baari karaa sida si waarta loogu maarayn karo looguna xakamayn karo qashinka iyo sidoo klae sida maaliyad loo siin karo kobcinta suuqa si loo dhiirrigeliyo dib-u-warshadeynta/dib-u-habeyn (*re-cycling*) qashinka iyo adeegyada fayadhowrka iyo nadaafadda ee maaraynta qashinka adkaha ah iyo kan dareeraha ahba.

Doorka ay Ururrada Bulshaada Rayidka ah ay ku leeyihiin Qaybta WASH-ka

Ururrada Aan Dowliga Ahayn iyo kuwa Bulshada Rayidka ah waxaa ay door muhiim ah ku leeyihiin bixinta adeegyada aasaasiga ah ee la siiyo dadweynaha marka aanay jirin dowlad dhexe oo xooggan. Waa waxda afaraad ee ka barbarshaqeysa lana tacaamusha dolwadda, la-hawlgalayaasha horumarinta iyo ganacisga gaarka loo leeyahay. Haseyeeshee, dowladda aragti ballaaran (*broad view*) kama qaadan muhiimadda ay leeyihiin Ururrada Bulshada Rayidka ah/*Civil Society Organizations* (CSOs). Tobannaankii sano ee la soo dhaafey, waxaa si weyn u kordhey tirada CSO-yada iyo baaxadda waxqabadyadooda. Waxaa ay door saamayn leh ku leeyihiin wax-ka-qabashada xaaladaha degdegga ah iyo xaaladaha bani'aadamnimada ee guud ahaan dalka.

Haseyeeshee, tan iyo burburkii dowladdii hore iyo soo-if-bixiddii ururrada bulshada ku salaysan; CSO-yada ma lahayn kaalin qeexan oo keli ahaan iyo wadajir ahaan ay kaga qaybgalaan. Sidaa daraaddeedna, saameynta ay ku leeyihiin siyaasadaha iyo adeeg-bixintu waa ay koobneyd. CSO-yada badidoodu waxaa ay diiradda saaraan mashaariicda WASH ee yaryar iyada oo iskaashi yar uu kala dhexeeyo ama uusan iskaashiba kala dhaxayn Hay'adaha Dowladda. Sidoo kale, sida ay ula tacaamulaan bulshooyinka ayaa badanaa ku kooban dhiirrigelinta ka-qaybgalka bulshada oo wax xoogaa la xiriira xoojinta codkooda.

CSO-yada ku hawlan qaybta WASH-ka ma laha cod midaysan ama madal ka dhexaysa oo ku wadaagaan macluumaadka iyo fikradaha. Waxaa lagamamaarmaan ah in la dhiso is-bahaysi iyo shabakad si loo ururiyo codadka CSO-yada iyo si awood loogu yeesho in si taabagal ah loogu

qareemeeyo SDG-yada 2030-ka, gaar ahaan yoolka 6aad. Si la mid ah sida dhaqdhaqaaadyada CSO-yada kale ee dalalka soo koreya; CSO-yada ku hawlan qaybta WASH-ka ee Soomaaliya ma laha qorshe ama istiraatiijiyad u-qareemayn oo ay galaangal ugu galaan si wax laga beddelo hababka istiraatiijiga ah oo ah in laga wareego waxqabad ku aaddan xaaladaha degdeg ah aan sii qorsheysneyn oo loo gudbo mid si guud loogu horumarinayo qaybtaoo lagu gaarayo in Cid Walba La Gaarsiiyo Adeegyada WASH-ka (*Univesal WASHCoverage*).

Maaliyadsiiinta Qaybta WASH-ka

Waa ay adag tahay in la fahmo sida maaliyad loo siiyo qaybta WASH-ka ee Soomaaliya. Haseyeeshee, waxaa jira afar ilood oo waawayn oo ay maaliyadda ka hesho qaybta WASHku sida tariifadaha (*tariffs*), gargaar la siiyo, ganacsiga gaarka ah iyo cashuuraha. Maaliyadda ay ka hesho cid kale (*external finance*) ayaa door muhiim ah ka qaata kobcinta kartida iyo bixinta adeegyada biyaha iyo fayadhowrka. Haseyeeshee, ma jiro tirakoob (istaatistik) ama macluumaad ku saabsan sida uuyahay gargaarka ay cid kale ka hesho waaxda biyaha iyo fayadhowrka ee Soomaaliya; laakiin marka la eego dunida maaliyaddaasi waa ay kordhaysay laga soo bilaabo sannadkii 2007dii. Muddadii u dhaxaysey 2003-08 gargaarka laba-geesoodka ah ee la siiyo biyaha ayaa kordhay celcelis ahaan sannadkii 15%. Gargaarka geesaha badan ayaa sidoo kale muddadii u dhaxaysay 2003-08 kordhey (4% sannadkii).

Ma jirin dareen gaar ah oo diiradda lagu saarayo bixinta maaliyad dadka ku filan oo lagu taageerayo in adeegyada WASH-ka oo si joogto ah lagu bixiyo Soomaaliya. Qabanqaabooyinka maaliyadsiiin ee waqtigan ayaa ku guuldarreystey in ay xaqiijiyaan horumar dhab ah oo lagu sii wanaajinayo in si joogto ah loo helo adeegyada biyaha ama fayadhowrka. Ma jirin maaliyad mug leh oo loogu tala-galay gacan-ku-hayn/dhaqaalayn looga hortagayo in ay dhibaato ku timaaddo iyo dayactiridda hantida raasamaalka ah. Miisaaniyadda WASH-ka waa in wax looga qabtaa hantida raasamaalka ah iyo hawlgalka shaqaba iyo sidoo kale ilaha dakhliga si loo ogaado halka ay wax ka dhimman yihiin.

Korjoogtaynta Qaybta WASH-kaiyo Nidaam Bixiya Digniin Hore

Ma jirto shabakad dowladeed oo xogta ururisa waxaana qaybta ay ku tiirsan tahay barnaamij maaraynta macluumaadka oo ay fuliso hay'adda SWALIM. Soomaaliya kama jiraan dadaallo ku saabsan maaraynta waaxda biyaha iyo fayadhowrka. Sidoo kale waaxdu si dhab ah uma oga inta ay le'eg yihiin biyaha dhulka hoostiisa ku jira. Waxaa jirta shabakadla socoto cimilada roobka

iyo biyaha oo haysata roob-beegayaal gacanta looga shaqeysiiyo, xarumo lagala socdo webiyada iyo xarumo cimilada si otomatik ah u cabbira oo xogta gudbin kara iyaga oo sii marinaya dayax-gacmeed. Waxaa sidoo kale jirey iskudday lagu doonayo in lagu bilaabo habab lagu khafiifinayo laguna maaraynayo abaarta iyada oo la adeegsanayo tasmada loo yaqaanno *Combined Drought Index (CDI)* ama Tasmada La-isku-biiriyay ee Abaarta. Hay'adda *Somalia Water Sources Information Management System (SWALIM)* waxaa ay haysaa in ka badan 2,250 macluumaad faahfaahsan ah oo laga soo qaadey ilo biyood istiraatiji ah; hannaanka ayaa dhowaan la sii wanaajiyay. Haseyeeshee, hay'adaha dowladdu ma laha kartidii loo baahnaa iyo shaqaale leh karti iyo aqoon ugu filan inay maareeyaan hannaanka sidoo kale ma laha himilo ay ku higsanayaan in ay agabka u adeegsadaan qorshaynta iyo isuduwidada hawlaha qaybta.

U dhammaanshaha Labada Jinsi iyo Bulshada

Haweenka ayaa uu ku dhacaa culayska ugu weyn ee biyo-aroorka, iyaga oo marar badan xilliyada jiilaalka u lugeeya ilaa 10 kmsi ay u soo helaan biyo. Culayska in biyo la cabbo laga keeno ilo ka fog guriga waxaa uu si aan dheellitirneyn ugu dhacaa gabdhaha iyo haweenka. Guud ahaan Soomaaliya oo dhan haweenka iyo gabdhaha ayaa ah kuwa ugu weyn ee reeraha siiya biyo iyo adeegyada fayadhowrka, waxaana sidoo kale mas'uuliyad aasaasi ah ay ka saaran tahay in uu guriga mar walba nadiif ahaado. Sidaa daraaddeed helid la'aanta biyo nadiif ah iyo tas-hiilaad fayadhowr waxaa ay si weyn raad ugu leedahay haweenka iyo gabdhaha. Tani waxaa ay si weyn u yaraynaysaa waqtiga ay haweenka iyo gabdhaha u soo haraya si ay u qabsadaan hawlhooda kale sida daryeelka carruurta, dakhli ay raadsadaan iyo iskuul ay tagaan. Gabdhaha ayaa badanaa ku khasbanaada in ay u lugeeyaan masafooyin dhaadheer si ay biyo u soo arooraan subaxda hore. Hawshaa culayska leh dabadeed, ayaa waxaa laga yaabaa in ay ka soo daahaan ayna iskuulka yimaadaan iyaga oo daallan. Sababta ugu weyn ee ay iskuulka uga haraan carruurta, gaar ahaan gabdhaha ka dhashey qoysaska saboolka ah ayaa ah in loogu baahdo 'shaqada guriga'. In biyo lagu bixiyo meel guryaha u dhow ayaa kordhinaysa waqtiga firaaqada ah ee gabdhaha waxaana ay kordhineysaa joogistooda iskuulka.

Intaa waxaa dheer, in si yar loo heli karo adeegyada WASH-ka oo tayo leh waxaa ay taasi saameyn ku leedahay gabdhaha iyo haweenka. Marka ay gabdhuhu qaan-gaaraan, waxaa inta badan ay ku khasbanaadaan in ay fasallada ka maqnaadaan ama ay ka baxaan iskuulka, sababta oo ah ma haystaan musqulo iyaga u gaar ah oo hubinaya asturnaanta ugu yar ee ay u baahan yihiin. Jiritaan la'aanta tas-hiilaad fayadhowr iyo kuwo wax lagu dhaqdo oo habboon ayaa gabdhaha caadada qaba ka niyad-jebinaya inay iskuulka si buuxda u tagaan, waxaana badan

marka la isu geeyo maalmahaa ay saami mug leh ka noqdaan tirada maalmaha ay iskuulka ka maqanyihiin.

Waxaa jirta caddayn muujineysa in adeegyada biyaha iyo fayadhowrka ay badanaa ay taabogal yihiin haddii haweenku ay door firfircoon ka qaataan marxaladaha kala duwan ee la xiriira dhisiddooda, laga soo bilaabo nakhshadeynta ilaa qorsheynta, ilaa hawlgallada joogtada ah ee looga shaqaynsiinayo iyo habraacyada dayactirka loogu baahan yahay in mashruuc kasta uu ku noqdo mid waara. Qiimayn uu Bankiga Adduunku ku sameeyay 122 mashruuc oo biyaha la xiriira ayaa lagu ogaaday in taabogalnimada mashruuc ay lix ilaa toddoba jeer ay sarreysey marka ay haweenku ku lug leeyihiin marka loo eego marka aanay ku lug lahayn.

QAYBTA 2AAD

QAABKA GUUD EE SIYAASADDA

DALIILKA TILMAAMAYA IN BAAHI LOO QABO

Galmuudg waxaa culaysyo sii kordhaya ay ka haystaan maaraynta waaxda biyaha, nadaafadda iyo fayadhowrka, taas oo ka dhalatey jiritaan la'aanta siyaasad dowlad goboleed , qaabab guud shuruuc, xeer-nidaamiyeyaal iyo hay'adeed oo nidaamsan oo la isuduwey iyo yaraanshaha bixinta biyo-qaybinta magaalooyinka iyo miyigaba iyo adeegyada iyo tas-hiilaadka fayadhowrka. Sidaa daraaddeed, Dowladda Galmudug waxaa ay mudnaan weyn siisay diyaarinta Siyaasadda heer dowlad goboleed ee Biyaha, Nadaafadda iyo Fayadhowrka (Siyaasadda Qaran ee WASH-ka) si ay si guud ugu jiheyso sida wax looga qabanayo culaysyada waaxda waqtigan haysta iyo kuwa mustaqbalkaba.

HIMILADA

Biyo dad ku filan oo nadiif ah, nadaafad iyo fayadhowr la wada helo

HAWSHA

In la sii wanaajiyo helidda adeegyada fayadhowrka iyo biyo nadiif ah, aan qaali ahayn, loo siman yahay, joogto ah oo tayana leh, iyo kordhinta qaadashada hab-dhaqanno nadaafadeed oo heer shakhsi, qoys iyo bulshaba leh, oo ay ka dhalanayso (i) yaraanshaha heerarka cudurrada iyo dhimashada iyo (ii) in la sii wanaajiyo caafimaadka, wax-soo-saarka iyo tayada nolosha ee dadka (Wanaagga)

YOOLKA

Hubinta in dadka oo dhan ay helaan biyo nadiif ah, qiime jaban, loo siman yahay, tayo leh iyo, nadaafad iyo fayadhowr ay si joogto oo waarta loo maareeyo

UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- i. In la kordhiyo sida magaalooyinka iyo degaamada miyiga ah loogu helo biyo nadiif ah iyada oo loo marayo habab la isuduwey iyo in dhumaha biyaha wada la gaarsiiyo dhul badan sida ay dhigayaan yoolalka iyo bartilmaameedyada qaranka iyo kuwa caalamiga ah(SDG);

- ii. In la kordhiyo sida si loo siman yahay oo joogto ah loogu helayo adeegyada fayadhowrka, loo dhiirrigelinayo isbeddel weyn oo lagu sameeyo hab-dhaqanka dadka ee dhinaca nadaafadda iyo in la joojiyo in bannaannada lagu xaajo guto sida ay dhigayaan yoolalka iyo bartilmaameedyada qaranka iyo kuwa caalamiga ah (SDG);
- iv. In la bixiyo nidaam loo maareeyo bullacadaha oo hufan, deegaanka u habboon oo dhaqankana waafaqsan iyo in la sii wanaajiyo maaraynta qashinka adka ah, kan dareeraha ah iyo kan halista ah;
- v. In la dhiso lana sii xoojiyo qaababka guud ee hay'adeed, maarayn iyo sharci si qaab ku habboon loogu maareeyo kheyraadka biyaha iyo sidoo kale adeegyada nadaafadda iyo fayadhowrka;
- vi. In la dhiirrigeliyo ka-qaybgalka bulshada, ku lug lahaanshaha ganacsiga gaarka loo leeyahay, isuduwidka ka dhaxaysa waaxaha kala duwan iyo iskaashiga la-hawlgalayaasha iyo in si dhammaystiran oo waarta loo horumariyo waaxda;
- vii. In la sameeyo hannaan adag oo firfircoon oo qaabilsan maaraynta macluumaadka oo bixiyana digniin hore oo loo adeegsado in qorsheyn ku habboon loo sameeyo qaybta, lagula socdo horumarka, lagu sii wanaajiyo isla-xisaabtanka oo si habboonna loogu maareeyo adeegyada kheyraadka biyaha, nadaafadda iyo fayadhowrka;

QIYAMKA IYO MABAA'DIIDA AASAASIGA AH

Qiyamkan iyo mabaa'diidan soo socda ayaa aasaas u ah oo ku dhisan tahay SiyaasaddaqaybtaWASH-ka ee Soomaaliya:

- 1) In si loo dhan yahay oo loo siman yahay loo helo adeegyada WASH-ka oo bed qaba, qiimo jaban, kharash yar, oo tayo wanaagsan leh oo ay helaan dhammaan dadka ku dhaqan Soomaaliya.
- 2) In maamulka iyo hoggaanka ay si taabagal ah, daahfuran oo isla-xisaabtan ku dheehan ay u maareeyaan qaybaha kala duwan ee hannaanka WASH-ka, iyada oo la
- 3) Daadejinayo maaraynta sida loo bixinayo adeegyada WASH-ka.

- 4) In la sameeyo qaabab hufan oo iskaashi iyo isuduwid loogula shaqeeyo bulshada deegaanka, daneeyeyaasha heer qaran iyo heer caalami ah iyo ku shaqaynta hababka uu taabogal ku noqdo gargaarka.
- 5) Adeegyo tayo wanaagsan leh – si habboon loo maamulo, si quman la isugu dhafay, la heli karo, la soo gaari karo, isla xisaabtan leh, qiimo jaban oo waara (oo ay la socoto in la yareeyo barnaamijyo iyo mashaariic gooni u taagan oo dusha dadka lagaga keenay iyo wixii lahalmaala).
- 6) In xoogga la saaro ka-hortagga iyo xakamaynta cudurrada iyo xaaladaha caafimaad ee la xiriira WASH-ka ee mudnaanta la siiyay.
- 7) Wax-ka-qabashada baahiyaha gaarka ah ee kooxaha nugul, bulshooyinka reer-miyiga iyo kuwa reer-guuraagaah.
- 8) Waxqabadyo xaqiiqo ku dhisan oo ku salaysan in si habboon loo adeegsado macluumaad la isku hallayn karo oo ku saabsan WASH ka.
- 9) In si macno ku fadhida ay muwaadiniinta ugu lug lahaadaan ugana qaybgalaan maaraynta iyo maaliyad-siinta adeegyada WASH ka.
- 10) In la kordhiyo oo lana badiyo noocyada iskaashiga maamulka iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay.
- 11) Hirgelinta nidaamyo maaliyadsiin WASH-ka oo dhiirrigeliya in si loo siman yahay loo helo adeegyada WASH-ka ee mudnaanta la siiyay.

CUTUBKA 1

ADEEG-BIXINTA BIYAHA .

Guud ahaan dalka iyo Galmudug ba waxaa aad u koraya magaalooyinka, taas oo uu dedejinayo barakaca ka dhashay colaadda iyo abaarta. Helidda biyaha ee magaalooyinka aad bay u hooseysaa waxaana helidda biyaha tubooyinku wadaan ay tahay 19%. Haseyeeshee, qaar badan oo ka mid ah dadka deggan magaalooyinka iyo deegaannada ku dheggan magaalooyinka (oo ay ka mid yihiin Barakcayaasha) waxaa ay ku tiirsan yihiin biyo-iibiyeyaal yaryar oo dadka biyo tayadoodu hooseyso kaga iibiya qiime sarreeya iyada oo markaa dadka saboolka ah ay biyaha ku bixiyaan ilaa shan-laab qiime ka badan kuwa dadka kale. Caadi ahaan, dadka ku nool magaalooyinka waawayn iyo kuwa yaryar eedeegaannada ay colaadduhu ka jiraan ee koonfurta waxaa biyaha siiya shabakad yar oo xaafadeed ama waxaa siiyagaaridameerrogarr ah oo biyaha iibiya. Badi tas-hiilaadka biyaha ee magaalooyinka waxaa ay ku sugan yihiin xaalado deegaameed iyo fayadhowr oo liita.

Aqlabiyadda dadka Galmudug waxaa ay ku nool yihiin degaamo miyi ah (60%, JMP 2017); waa xoolo-dhaqato iyo xool-dhaqato beeraleyna ah deegaan joogto-u-eke ah ku nool (*semi-sedentary*) qaarkood ay yihiin kuwo tuulooyin si joogto ah ugu nool. Bulshooyinka miyiga ku nool waxaa ay biyaha ay u baahan yihiin ka helaan webiyada (kuwo aan joogto ahayn iyo kuwo joogto ahba), ilaha, biyaha roobka (balliyada, baraagaha, ceelasha gaagaaban iyo ceelasha riigga ee dhaadheer. Meelaha ay biyaha ka helaan xoolo-dhaqatada ee hadda shaqeeya waa kuwo aan dad ku filneyn waxaana ay taasi sababtaa nabaadguurka deegaanka taas oo ku timaadda daaqsinta saa'idka ah ee agagaarka meelaha biyaha hadda laga helo.

Sannadihii dhowaa, mashaariicda biyaha deegaannada miyiga ah waxaa ay diiradda saarayeen dayactiridda kaabayaasha. Waxaa jirta caddayn tilmaamaysa in qaar ka mid ah ilaha biyaha laga helo si joogto ah ay 2-3 sanaba “u dayactiraan” hay’ado kala duwan. Arrintan ayaa ka dhigan in lagu guul-darreystey qaababka loo sameeyo waxqabadyada biyaha oo u sameysan qaab gargaar ah oo aan tixgelineyn waaridda iyo maamullada ka mas’uulka ah arrimaha biyaha oo aan diiwaangelin mashaariicda biyaha.

Abaarta iyo barakaca gudaha ayaa si ba’an u carqaleeday helidda biyaha, iyada oo biyaha loo baahan yahay badanaa lagu helo biyo-dhaamin qaali ah iyada oo biyaha lagu shubayo keydadka biyaha ee degaamada si joogtada ah loo deggan yahay ama toos loo geeyo degaamada daaqa loo tago.

Culeysyada ugu waawayn ee haysta helidda biyaha waxaa ka mid ah:

- ☐ Hawlgelinta mashaariicda biyaha ee horey u jirey ee aan hadda shaqayn iyo samaynta tas-hiilaad cusub oo biyo laga helo.
- ☐ Kordhinta dadka ay gaarto biyo-qaybinta oo hadda ah 40% lana gaarsiiyo 70% iyada oo loo marayo soo-nooleynta mashaariicda biyo-qaybinta ee hadda aan shaqayn iyo samaynta tas-hiilaad cusub oo biyo-qaybin.
- ☐ Baahida joogtada ah ee loo qabo in la sii wanaajiyo maaraynta hawlgallada iyo dayactirka nidaamyada biyo-qaybinta.
 - ☐ Kordhinta tayada adeegyada biyo-qaybinta.
 - ☐ Dhibaato ka jirta dejinta tacriifadaha si looga soo celiyo kharashka ku baxa maaraynta hawlgelinta iyo dayactiridda tas-hiilaadka bixinta biyaha iyo hubinta in sinnaan iyo caddaalad ay helaan bulshooyinka saboolka ah iyo kuwa la faquuqo/fogeeyo.
- ☐ Dakhli iyo maalgelin ku filan oo aan loo helin tas-hiilaadka biyo-qaybinta.

Wasaaradda tamarta yo kheeyraadka biyaha Galmuudg iyadoo kaashaneysa dowladda Galmudug waxaa ka go'an in ay joojiso yaraanshaha ay yaraanayaan deegaannada biyaha laga helo iyo tayadooda iyada oo loo marayo barnaamijyo dayactirid, sii-ballaarin iyo sii wanaajin ah. Tani waxaa ay u baahan tahay in maalgelin badan ay si joogto ah ugu bixiso dowladda iyo in taageero laga helo wada-hawlgelayaasha horumarinta. Ujeeddada ugu weyn laga leeyahay waa xaqiijinta in si joogto ah loo kobciyo loona maareeyo nidaamyada biyo-qaybinta ee degaamada magaalooyinka iyo miyigaba.

1.1 Ujeeddooyinka siyaasadeed ee gaarka ah waa:

- i. In la sii wanaajiyo dadka ku dhaqan magaalooyinka iyo miyiga ee ay gaarto biyo-qaybinta oo hadda ah 40% lana gaarsiiyo 70% ugu dambeyn sannadka **2025ka**.
- ii. In la kobciyo shaqaale qaban kara adeegyada biyaha oo si joogto ah loo bixiyo.
- iii. Sii wanaajinta kartida dhinaca cilmi-baarista ah iyada oo la adeegsanayo tiknolojiyad ku habboon xaaladda deegaanka, in muddo dheer la isticmaalo agab waari karo oo loogu talogaley bixinta biyaha sida tubooyin PCV ama CPVC ah iyo in la dhiirrigeliyo tiknolojiyad loo adeegsado mashaariicda biyo-qaybinta miyiga.
- iv. In la kobciyo tiknolojiyada kale ee biyo-qaybinta sida ka-faa'iideysiga biyaha roobka.

v. In si tartiib-tartiib ah loo kordhiyo in bulshadu ay bixiso kharashka ku baxa hawlgelinta iyo gacan-ku-haynta mashaariicda biyaha iyo hubinta ka-qaybgalka bulshada ee qorsheynta, dhisidda, hawlgelinta iyo gacan-ku-haynta mashaariicda ay biyaha ka helaan.

vi. Dhiirrigelinta in si xaq ku dhisan ay haweenku cid ugu matesho qorshaynta, go'aan-qaadashada iyo maaraynta mashaariicda biyo-qaybinta.

1.2 Hawraarta Siyaasadeed ee Biyo-qaybinta Magaalooyinka

Dowladdu waxaa ay hubin doontaa in biyo ku filan oo nadiif ah ay helaan dhammaan qoysaska ku nool magaalooyinka taas oo ay la socdaan dhiirrigelinta nadaafadda iyo fayadhowrka laga dhex sameeyo goobaha la deggan yahay (*on-site sanitation*). Adeegyadan aasaasiga ah waa bixinta biyo nadiif ah oo dadka ku filan (25 litir/qofkii/maalintii), iyo nidaamyada fayadhowrka ee goobaha la deggan yahay(*on-site sanitation system*).

1.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

i. Dhammaan nidaamyada biyaha iyo fayadhowrka ayaa la dayactiri doonaa si gaarsiisan sidii ay ahaan jireen dagaalka ka hor iyada oo la bilaabay mashruuc qaran oo lagu dayactirayo laguna ballaarinayo biyo-qaybinta magaalooyinka.

ii. Adeeg-bixiyeyaasha ayaa bixinaya 25 litir oo biyo nadiif ah qofkii halkii maalinba sida ay dhigayaan Dhabbe-tuseyaasha Tayada Biyaha La Cabbo ama jaangooyooyinka tayada biyaha ee dalka sida loo dajiyay iyo goorta la dejiyay.

iii. Tayada biyaha ay qaybiyaan dhammaan nidaamyada biyo-qaybinta ee Soomaaliya waa in loola socdaa si joogto ah oo waafaqsan habraacyada uu u dejiyey gole nidaamiye (regulatory board).

iv. Nidaamyada fayadhowrka ee magaalooyinka waawayn ayaa loo soo noolayn doonaa sida ugu dhaqso badan ee suuragalka ah ka dibna si tartiib-tartiib ah ayaa loo ballaarin doonaa.

1.2 Hawraarta Siyaasadeed ee Biyo-qaybinta Miyiga

Dowladdu waxaa ay hubin doontaa in biyo ku filan oo nadiif ah ay helaan dhammaan qoysaska ku nool miyiga taas oo ay la socoto dhiirrigelinta nadaafadda. Adeegyadan aasaasiga ah waa bixinta biyo nadiif ah oo dadka ku filan (25 litir/qofkii/maalintii) iyo dhiirrigelinta nadaafadda (in si cad loo fahmo waxa ay yihiin hab-dhaqannada wanaagsan ee nadaafadda).

1.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. Dhammaan nidaamyada biyo-qaybinta miyiga ayaa la daraaseyn doonaa lana dayactiri doonaa waxaana la diyaarin doonaa lana hirgelin doonaa mashruuca hufidda iyo sii ballaarinta biyo-qaybinta miyiga.
- ii. Bixinta biyaha looga baahan yahay miyiga waa in ay ahaataa mid ku salaysan lahaanshaha bulshada, iyada oo ay bulshadu lahaanayso hoggaaminta mashruuca marka laga soo bilaabo curinta fikirka ilaa maaraynta mashaariicda la dhammakystiro.
- iii. Kobcinta kaabayaasha biyo-qaybinta miyiga waxaa ay u baahan tahay in ay lahaadaan qaab la isuduwey oo taabagal ah oo ay kharashka u wadaagayaan maamul federaal, dowlad-goboleed, gobol, degmo iyo bulsho.
- iv. Diyaarinta iyo bixinta adeegyada biyo-qaybinta waxaa ay ku saleysnaan doonaan dalabka cidda u baahan, taas oo ka muuqaneysa u-diyaar-ahaanshaha iyo awoodidda iska bixinta dhammaan kharashaadka hawlgleinta & dayactiridda.
- v. Waxaa si xooggan loogu hawlgeil doonnaa dhiirrigelinta nadaafadda si loo dardargeliyo loona ballaariyo faa'iidada caafimaad ee laga helayo marka ay is-beddelaan hab-dhaqannada nadaafadeed ee dadka.
- vi. Markasta oo ay suuragal tahay abaabulidda bulshada, kobcinta tas-hiilaadka biyo-qaybinta yo dhiirrigelinta nadaafadda ayaa la fududayn doonaa/kor loo qaadi doonaa iyada oo qayb ka ah xirmada adeegyada aasaasiga ah ee biyaha iyo fayadhowrka.

1.3 Hawraarta Siyaasadda ee Qaashada Hababka u Roon Dadka Saboolka ah

Habab u roon dadka saboolka ah oo lagu bixiyo adeegga biyo-qaybinta ayaa la qaadan doonaa. Saboolnimada ayaa ah caqabad weyn oo hortaagan helidda biyaha, laga bilaabo min qoys, degmo, gobol ilaa heer qaran. Bulshooyinka waxaa ka mid ah qoysas aan awoodi Karin in ay iska bixiyaan kharashaadka nidaamyada biyaha ee la sii wanaajiyey haddii aanay taageero ka helin qoysas kale ama dowladda. Qoysas badan oo sabool ah ayaa saami aad u sarreeya oo

dakhligooda ka mid ah ku bixiya adeegyada biyaha iyo fayadhowkra ee ay maalin kasta u baahan yihiin ku waa soo ay bixiyaan ganacsiyada gaarka loo leeyahay eesida aan rasmiga ahayn adeeggaas u bixiya.

1.3.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. Biyo heliddadadka saboolka ah waa in la hubiyaa iyada oo la marayo qabanqaabooyin gaar ah gaar ahaanna marka la dejinayo siyaasadaha tacriifadda;
- ii. Tacriifado taageero (bulsho) ah waa in la qaataa si loo hubiyo in qof kasta uu helo adeeg biyood oo aasaasi ah. Tacriifadda waa in ay ku filnaataa keliya kharashaadka hawlgelinta iyo gacan-ku-haynta/dayactiridda. Suuragal iyo caqligal midna ma aha in taeriifadda ugu hooseysa lagu wada saleeyo dalka oo dhan – taasi waxaa ay la mid tahay taeriifad qiime iskumid ah loo sameeyo. Qiimayaasha noocaas ah waa in loo go'aamiyaa heer deegaan ama gobol iyada oo ay si buuxda uga qaybqaadanayaan dhammaan dhinacyada daneeya;

1.4 Hawraar Siyaasadeed –wanaagga bulshada oo loo maro tixgelin bulsho iyo mid deegaameed

Maalgelinta waaxda biyaha iyo fayadhowrka waxaa ay noqona^ysaamid bulshada iyo deegaanka tixgelisa. Tixgelinta deegaanka waa in lagu dhafaa qorsheyaasha istiraatiijiga ah iyo kuwa maalgelinta ee biyaha iyo fayadhowrka ee ay diyaariyaan adeeg-bixiyeyaasha iyo maamullada dowladeed. Ka-qaybgalka bulshada ayaa aasaasi u ah waaridda mashaariicda biyaha iyo fayadhowrka ee magaalooyinka. Bulshooyinka ku nool magaalooyinka ayaa lagu dhiirrigelin doonaa laguna taageeri doonaa in ay ka-qaybgalaan qorshaynta iyo go'aamada la qaadanayo. Lafa-guris lagu sameeyo baahiyaha labada jinsi ayaa loo adeegsan doonaa in lagu qiimeeyo ka-qaybgalka ragga iyo haweenka ee geeddi-socodka qorshaynta.

1.4.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. Cid kasta oo taageereysa mashruuc waa in ay daraaseysaa deegaanka iyo raadadka uu ku leeyahay wanaagga bulshada iyo deegaanka. Tani waxaa ay qofka taageeraya mashruuca

awood u siineysaa in uu nakh-shadeeyo uuna hirgeliyo tallaabooyin lagu khafiifinayo raadadka iyo qorsheyaal lagu maaraynayo deegaanka.

- ii. Barnaamijyo taabagal ah oo la xiriira ilaalinta deegaanka iyo dhiirrigelinta nadaafadda oo loogu talogaley macaamiisha, macaahidda waxbarashada iyo daneeyeyaasha kale ee gudaha iyo dibaddaba ayaa la diyaarin doonaa lana hirgelin doonaa.
- iii. Haweenka iyo carruurta ayaa xuddun u ahaan doona dhiirrigelinta hab-dhaqanno fayadhowr iyo nadaafadeed oo ka wanaagsan kuwa hadda.

1.5 Hawraarta Siyaasadeed ee Tayada Biyaha

Iyada oo yoolka ugu dambeeya ee laga leeyahay uu yahay in dalka laga helo shabakad baarta tayada biyaha, ayaa lagu talinayaa in loo maro habab marxalado kala duwan maraya. iyada oo lagu xisaabtamayo xaddidnaanta khayraadka.

1.5.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. Ugu horraynwaxaa la samaynayaa tas-hiilaad lagu baaro tayada biyaha oo heer federaal iyo heer maamul dowlad-goboleed ah, oo si tartiib-tartiib ah loogu qalabeeyo agab taxliilined/lafa-guris oo heer sare ah.
- ii. Shaybaarro lagu baaro Tayada Biyaha oo haysta shaqaale tababaran iyo qalabka lagamamaarmaanka u ah oo laga sameeyo gobol kasta, oo marka hore lagu qalabeeyo qalab lagu baarobiyaha.
- iii. Abuurista iyo sii xoojinta qalabka baarista tayada biyaha ee degmo kasta si loogu samayn karo cabbiraado kala duwan –waxyaalaha biyaha ka muuqda laf-ahaantooda, noolaha yaryar iyo kiimikooyinka ku jira ku samayn kartobadi cabbiraadaha ugu badan ee la adeegsado.
- iv. In la baaro lana hubiyo tayada dhammaan goobaha biyaha laga helo ee cusub ka hor inta aanay bulshooyinku isticmaalin biyahaasi iyo in natiijooyinka ka soo baxa la baahiyo/lalana wadaago maamullada deegaanka.

- v. In marka ugu horreysa ee khayraadka la hayo uu oggolaanayo, baaritaanno lagu sameeyo goobo biyaha laga helo oo si aan isku xig xigin(randomly) loo soo xulay oo xogahana lagu keydiyo heer maamul deegaan.
- vi. Qalab baaritaan oo deegaannada gudaha lagu isticmaalo (*present/absence tests*) ayaa loo qaybin karaa bulshooyinka deegaannada fogfog ku yaalla si loogu adeegsado baaritaanno mararka qaar lagu sameeyo sida ay qoysasku guryahooda ugu nadiifiyaan biyaha ay cabbaan [laakiin iyada oo la xusuusnaanayo baaritaannada *presence/absence* aanay mar walba sheegin in saxaro ay gaartey biyaha iyo in kale maaddaama ay sidoo kale tilmaamnaan bakteeriyada sida dabiiciga ah ugu jirta biyaha ee aan lahayn wax halis caafimaad ah].

1.6 Hawraarta Siyaasadeed – Waaridda adeegga oo loo maro lahaanshaha bulshada

Dowladdu waxaa ay hubin doontaa waaridda adeegyada iyada oo loo marayo ka-qaybgalka bulshada ee dhammaan dhinacyada kala duwan ee adeeg-bixinta. Bulshooyinka muujiya rabitaan awoodana bixinta adeegyada biyaha ayaa laxoojinayaa, iyada oo loo marayo ka-qaybgalinta dhammaan dhinacyada kala duwan ee adeeg-bixinta taas oo ay ka mid tahay qorshaynta iyo dhisidda tas-hiilaadka. Bulshada ayaa lahaanaysa, maaraynaysana tas-hiilaadka dhismahooda la dhammeeyey kana mas'uul ahaanaysa hawl-gelinta, gacan-ku-haynta/dayactiridda iyo maarayntas-hiilaadka.

1.6.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. Waxaa la kobcin doonaa qaab maamul guud oo ay ka mid yihiin nidaamyo maarayneed oo ay suuragal tahay in ay bulshadu hawl-geliso ayna gacanta ku hayso, dayactirtana;
- ii. Tabo dayactir oo la xaqiijiyeey, oo ku habboon deegaanka oo ay bulshadu gacanta ku hayso, oo biyo nadiif ah oo la cabbi karo si joogto ah u bixinaya oo ugu habboon badan xaaladaha deegaanka ayaa la dhiirrigelin doonaa. Kuwan waxaa ka mid ah ceelal-gacmeed iyo ceelasha kale ee ay ku xiran yihiin bamamka gacanta, ilo-biyoodyo la dhawray, mashaariic tuubooyin dhulka kala sarreeya daraaddii ay biyuhu caadi u socdaan(gravity pipe schemes), ka-faa'iidaydiga biyaha roobka, iyo tiknolojiyadaha loo

adeegsado in biyaha lagu nadiifiyo guryaha dhexdoodasida koloriin ku-daridda, miirayaasha loo yaqaanno *bio-sand filters*, iyo qoraxda oo loo adeegsado jeermis-dilidda biyaha.

- iii. Nidaamyada aanay ka shaqaysiin karin ama aanay dayactiri karin bulshada deegaanku (t.a. bamamka motoorka ku xiran ama bamamka matoorrada dabdhalayayaasha ahi ay wadaan) waa in aan la oggolaan ama aan laqaadanin.
- iv. Farsamayaqaannada deegaanka ayaa lagu tababari doonaa dayactiridda iyo helidda qalabka lagu dayactiro, helistiisana waxaa lala kaashan doono ganacsiga gaarka loo leeyahay.
- v. Waxa laga shaqayn doonaa kobcinta ganacsiga gaarka loo leeyahay, si ay u bixiyaan adeeg ayna u sameeyaan dayactir.
- vi. Keliya waxaa mashaariicda qaybinta biyaha loo isticmaali doonaa bamam tayadooda la xaqiijiyeey oo leh qalab dayactir oo si fudud loo heli karo, iyada oo loo marayo wada-shaqayn lala yeesho ganacsiga gaarka loo leeyahay.

1.7 Hawraarta Siyaasadeed ee dhiirrigelinta in biyaha lagu nadiifiyo laguna keydiyo guryaha

Dowladdu waxa ay dhiirrigelineysaa qaabab biyaha lagu nadiifiyo guryaha dhexdooda / *Household water treatment* (HWT), kaas oo si dadka ku filan u yaraynaya jeermiska ku jira biyaha,

oo raad mug leh oo wanaagsan ku yeelan kara caafimaadka dadweynaha oo una habboon xaaladaha deegaanka kajirta.

1.7.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed

- i. Samaynta noocyo kala duwan oo qaababka biyaha loogu nadiifiyo guryaha dhexdooda (HWTS) iyo dejinta dhabbe-tuseyaal tilmaamaya sida loo isticmaalo, sidoo kale sida ay u shaqeeyaan noocyada kala duwan ee HWTS, waxyaabaha ay ku fiican yihiin iyo

waxyaabaha ay ku xun yihiin si macluumaad looga siiyo macaamiisha iyo si ay u kala dooran karaan nooca ay u arkaan in uu u wanaagsan yahay;

- ii. Samaynta qaabab lagu heli karo (*supply chains*) oo loogu tala-galay kor

uqaadida/horumarinta iyo bixinta qalabka HWTS iyo walxaha kaleee ku baxa ka shaqaysiinta agabka biyaha (consumables) oo qaab joogto ah loo isticmaalo muddada fog;

- iii. Ku-tababaridda qoysaska hababka isticmaalka HWST, in la dabagalo si loogu dhiirrigeliyo in ay si joogto ah u isticmaalaan muddada fog iyo in lala socdo in ay si sax ah oo joogto ah ay u isticmaalayaan;

CUTUBKA 2

NADAAFADDA IYO

FAYADHOWRKA

Fayadhowrku waa arrin aasaasi ah oo muhiim u ah horumarinta, taas oo, si la mid ah sida arrimaha kale ee muhiimka u ah horumarinta u baahan in si dhab ah looga fekeriyo si horumar joogto ah ay u sameeyaan dhaqaalaha dalka iyo maaraynta kheyraadka biyaha. Culaysyada la xiriira fayadhowrka ee Soomaaliya waxaa ay la halmaalaan arrimo kala duwan, laga bilaabo helidda tas-hiilaadka iyo adeegyada fayadhowrka oo hooseeya iyo sidoo kale meelaha uu gaaro adeegga oo yar iyo adeegyada fayadhowrka oo tayadoodu liidata ilaa jiritaan la'aanta qaabab guud oo sharci iyo mid hay'adeed. Baahida fayadhowrku waa mid ka jirta guud ahaan dalka.

Helid la'aanta biyo nadiif ah, aqoonta fayadhowrka iyo nadaafadda ayaa ah sababta asalka u ah saboolnimada, maaddaama dadka saboolka ah, gaar ahaan haweenka iyo carruurtu ay yihiin kuwa dhibaataada ugu badan ka soo gaarto xaaladaha nololeed ee liidata iyo cudurrada.

Ereyga **Fayadhowr Dad ku Filan** waxaa loola jeedaa bixinta iyo gacan-ku-haynta nidaamyo ama tas-hiilaad loo isticmaalo asturidda/ka-takhalusidda saxarada dadka, biyaha wasakhda ah iyo qashinka guryaha, kuwaas oo ah kuwo ay aqbali karaan ayna kharashkiisa iska bixin karaan bulshooyinka Galmudug. Kuwaas waxaa ka mid ah musqulo iyo waxyaabaha lagu isticmaalo, tubooyinka iyo waxyaabaha lagu nadiifiyo/daweeyo. Tas-hiilaadka waa in ay waafaqsanaadaan jaangooyooyinka loogu talogaley dhismaha, waa in ay ahaadaan kuwo nadaafaddoodu wanaagsan tahay oo si fududna loo soo gaari karo, waana in aanay lahayn waxyaabo dhibaato ku ahdeegaanka.

Ujeeddada ugu weyn ee laga leeyahay waa in la sii wanaajiyo caafimaadka bulshooyinka magaalooyinka iyo kuwa miyigaba iyada oo taas loo marayo kordhinta helidda adeegyada fayadhowrka iyo sii wanaajinta hab-dhaqannada nadaafadeed. Si taas loo xaqiijiyo, waa in la kordhiyaa heerarka adeegga fayadhowrka ee dad ku filan oo la gaarsiiyaa ugu yaraan 70% dadka ugu dambeyn 2025.

3.1 Ujeeddooyinka gaarka ah waxaa ka mid ah:

i. Taageeridda iyo bixinta waxbarasho ku saabsan fayadhowrka iyo nadaafadda oo sii wanaajisa caafimaadka dadka iyo tayada nololeed iyada oo loo sii marayo hab-dhaqannada nadaafadeed ee la aqbalikaro.

- ii. Kobcinta iyo sii-wanaajinta kartida bulshooyinka iyo ka-qaybgelinta bulshooyinka ee go'aan ka qaadashada mashaariicda.
- iii. Hubinta deegaan aan bannaanada lagu xaajo gudan/saxaroon iyo dhiirrigelinta fayadhowr dhammaystiran oo ay bulshadu hormuud u tahay (CLTS);
 - v. Hubinta in si ammaan ah loo asturo qashinka dareeraha ah, kan adkaha ah iyo kan warshadaha, sidoo kale daawada iyo kan daaweynta ka dhasha (*bio-medical waste*);
- vi. Sii wanaajinta in si ammaan ah loo maamulo oo loona isticmaalo biyaha la cabbo, iyada oo la hubinayo in weelasha lagu soo qaado iyo kuwa lagu kaydiyo maalin kasta lagu dhaqo biyo iyo in jeermis-dile lagu dhaqo toddobaadkiiba laba jeer;
- vii. In dhammaan saxarada carruurta yaryar lagu asturo musqulo, ka dibna gacmaha lagu dhaqdo biyo iyosaabuun;
- viii. In la dhiirrigeliyo in qof kasta uu saabuun ku gacmo-dhaqdo xilliyada xasaasiga ah; ka hor cunto-karinta iyo cunista cuntada, ka dib marka uu qofku saxaroodo, iyo ka dib marka uu carruurta ka nadiifiyosaxaro.
- ix. Hubinta in dhammaan iskuullada iyo xarumaha caafimaadka ay leeyihiin tas-hiilaad ku habboon oo gacmaha la isaga dhaqo oo mar walba leh biyo iyo saabuun;
 - ix. Hubinta waxyaabaha ay u baahan yihiin labada jinsi, si loo hubiyo hab-dhaqanno fayadhowr iyo nadaafadeed oo ammaan ah, gaar ahaan waxyaabaha la xiriira caafidhowrka ee ay u baahan yihiin gabdhaha iyo haweenka, sidoo kale in haweenka iyo gabdhaha lagu tababaro hab-dhaqan nadaafadeed oo si ammaan ah loogu isticmaalo loona asturo agabka fayadhowrka;

3.2 Hawraarta Siyaasadeed ee Ururinta Qashinka

Waayo-aragnimada laga qaatay sida hadda loo maareeyo qashinka ayaa muujineysa in hay'adaha rasmiga ah (maamulka) oo keliya aanay si dadka ku filan wax uga qaban Karinmaaraynta qashinka magaalooyinka oo tiradiisu, kakanaantiisu/murugsanaantiisu iyo kala duwanaanshihiisuba ay sii kordhayaan. Si wax looga qabto culaysyada la xiriira maaraynta qashinka ee haysta magaalooyinka, iyada oo loo marayo in si waarta loo maareeyo qashinka, waxaa la soo rogayaa qaab wada-shaqayn ah oo dhinac kasta mas'uuliyadaha uu leeyahay la caddaynayo, si qaab taabogal ah loogu maareeyo qashinka. Waxaa ay waajibineysaa in la diyaariyo Nidaamyo Qashinka Loo Maareeyo oo iskudhahan oo ay yeeshaan magaalooyinka waawayn.

3.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed

- i. Waa in la abuuraa hannaan ay ku jirto xog qaran oo la isku hallayn karo, si loo ogaado heerarka qashinka la soo saaro iyo xogta qashinka, iyada oo la tilmaamayo noocyada, ilaha ay ka soo baxaan iyo waxa ay ka kooban yihiin, si ay gacan uga geysato in si waarta loo maareeyo qashinka, heerarka soo-saaridda qashinka iyo waxa uu ka kooban yahay qashinkaasi.
- ii. Waa in la tababaraa shaqaale ku filan oo aqoon iyo karti leh, lana geeyaa goobaha shaqada si ay si taabogal ah ugu maamulaan uguna shaqeeyaan nidaamyada iyo qalabka kala duwan ee maaraynta qashinka.
- iii. Waa in la dhiirrigeliyaa Iskaashiga maamulka (Dawladda) iyo Ganacsiga Gaarka ah (PPP), si ganacsiga gaarka loo leeyahay uu u samayn karo ururinta qashinka, xarumaha dib-u-warshadeynta qashinka, dhulka lagu aaso qashinka iyo meelaha lagu gubo qashinka oo loo naq-shadeeyey qaab keeni kara in ay ka qaybgalaan dadka saboolka ah, iyada oo u ah fursad uu dakhli ku soo geli karo.
- iv. Waa in qashinka lagu kala saaraa halka uu ka yimaado, iyada oo la samaynayo xarumo laga sii gudbiyo oo leh awood ku filan iyo meelo la tuulo agabka la burburiyey iyo meelo ammaan ah oo loogu talogaley si aanay isu gaarin ama aanay uga sii darin oo aanay isu beddelin.
 - v. Waa in la diyaariyaa qorshe guud (*a master plan*) oo loogu tala-galay sii kordhinta hufnaanta ururinta dhammaan noocyada kala duwan ee qashinka, adeegyada la xiriira ururintooda iyo gaadiid-ku-qaadistooda, iyada oo si adag loo xakamaynayo maaraynta qashinka gaarka ah ama halista ah (t.a. kiimikada, qashinka caafimaadka iwm) iyo iyada oo la mamnuucayo dib-u-warshadeyntiisa ama dib-u-isticmaalistiisaba.
- vi. Waa in la sameeyaa nidaam hufan oo gaadiid loogu qaado qashinka kala duwan ee ka yimaada meelaha kala duwan, deegaamada miyiga iyo magaalooyinka oo geeya meelo lagu asturo iyo tas-hiilaad wax looga qabto.
- vii. Maamullada deegaanadu waa in ay Nidaamyada *Geographic Information Systems (GIS)* iyo *Remote Sensing (RS)* u adeegsadaan sii wanaajinta khariidadeynta/jaantuseynta qashinka, gacan ka geysashada qashin ururinta iyo gaadiid-ku-qaadista hufan.

uu Waa in la dejiyaa siyaasado iyo qorshe iskudhafan oo loo adeegsado maaraynta qashinka, si ay u taageeraan dadka saboolka ah iyo si ay awood ugu siiyaan in ay ka-qaybgalaan maaraynta qashinka, iyada oo u ah meel ay shaqo ka helaan oo dakhliina ka soogalo.

3.3 Hawraarta Siyaasadda Qubista iyo Aasidda Qashinka Adkaha ah

Dowladda oo diyaarisa istiraatiijiyad ku saabsan insi waarta loo qubo qashinka, si loosii wanaajiyo guud ahaan qashinka ay qaadi karaan ayna asturi karaan, iyada oo loo marayo ololeyaal nadaafadeed oo degdeg ah; madaxda siyaasadda, kuwa maamulka iyo kuwa magaalada/dawladda hoose iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay oo laga qaybgeliyo qubista qashinka iyo dhiirrigelinta dib-u-warshadaynta, dib-u-isticmaalidda iyo baaba'inta.

Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. Qashinka la qubayo waa in lagu aasaa godad loogu tala-galay si looga hortago in ay wasakheeyaan biyaha iyocarrada.
- iii. Soo-xulidda, naq-shadaynta, dhisidda iyo hawl-gelinta goobaha lagu aaso qashinka waa in loo maraa nidaamyada maaraynta deegaanka ee u habboon si loo ilaaliyo deegaanka guud ahaan muddada uu qashinka halkaas ku aasan yahay.
- iv. Hubinta in si joogto ah loo dayactiro goobaha qashinka lagu qubo, waana in la diyaariyaa wax lagu qabtogaaskamethane.

- iv. Daraaseynta, dhiirrigelinta iyo beddelidda fursadaha kala duwan ee si ammaan ah oo qiime jaban ay qoysaska iyo bulshadu u asturaan/qubaan saxarada.

Sida loo asturo qashinka adkaha waxaa maarayn doona dhammaan Maamullada Dawladaha Hoose si waafaqsan siyaasadaha, istiraatiijiyadaha iyo xeer-nidaamiye-yaasha qaran ee maaraynta qashinka adkaha ah oo la diyaarin doono.

3.4 Hawraar Siyaasadeed ku saabsan Maaraynta Qashinka Adkaha ah (Qashinka laga helo goobaha Caafimaadka/bio-medical iyo kan Halista ah)

Qashinka goobaha daryeelka caafimaadka, sida qashinka halista ah iyo qashinka bayolojig ah, ay ka mid yihiin sahayda caafimaadka ee la qubo isticmaalka ka dib ayaa dhibaatooyin ba'an ku ah caafimaadka dadweynaha. Kuwaas waxaa ka mid ah qashinka cudurrada faafiya oo ay ka mid yihiin qashinka waxyaabaha afka leh, qashinka qaybaha jirka dadka laga gooyey, qashinka kiimikada ah ama daawada ah, iyo qashinka fallaaraha *radioactive ka ah* iyo kan *cyto-toxic* ee sunta ku ah unugyada nool. Noocyadan qashinka ah waa kuwo aad u faafa loona dhinto. Dowladda ayaa tas-hiilaadka daryeelka caafimaadka siin doonta siyaasad iyo dhabbe-tuse cad oo ay qashinka caafimaadka ay ugu maareeyaan si habboon oo waafaqsan Xeer-nidaamiyeyaaasha Dawladda, oo loo dejin doono qaab lagu yaraynayo halista qashinka daryeelka caafimaadka ku keenayo shaqaalaha, bukaannada, dadka soo booqanaya bukaanka, kuwa ka shaqeeya iyo deegaanka.

3.4.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed

- i. Dhammaan qashinka ka soo baxa tas-hiilaadka daryeelka caafimaadka ee gaarka loo leeyahay iyo kuwa guud oo lagu gubo ama lagu jarjaro nidaam qalab ahaan u diyaarsan oo qashinka noocaas ah u maamuli kara si aan dhibaato u keeneynin deegaanka.
- ii. Waa in si adag loo kantaroolaa maamulidda qashinka caafimaadka iyo qashinka kale ee halista ah waana in la mamnuuca in dib loo warshadeeyo ama dib loo isticmaalo.
- iii. Dowladdu waa in ay dejisaa siyaasado iyo dhabbe-tuseyaal loogu talogaley maaraynta qashinka goobaha daryeelka caafimaadka si ay u kaabaan in si iskudhafan loo maareeyo qashinka bayoloojiga ah iyo kan goobaha daryeelka caafimaadka (*bio-medical waste*) oo ay soo hoosgelayaan, soo-ururinta, daaweynta (*treatment*), qubista, iwm si waafaqsan dhabbe-tuseyaasha WHO.
- iv. Dowladdu waa in ay diyaarisaa olole xooggan oo dadweynaha loogawacyi-gelinayo raadka ay noocyada kala duwan ee qashinku ay ku leeyihiin caafimaadka dadka si ay u kordho ka-qaybgalka bulshada iyo si faham iyo aqoon wanaagsan loogu yeesho, tirada, nooca iyo sun-ahaanshaha qashinka halista ah iyo sida aan deegaanka wax u dhimmayn ee loo maaraynkaro.
- v. Dowladdu waa in ay dhistaa hay'ado u gaar ah oo korjoogteeya, ka-soo-warbixiya oo dabagala tayada iyo tirada qashinka iyo waxa ay ku dambeeyaan. Hay'addu waa in ay baaritaanno joogto ah ku sameysaa tayada qiiiqa ka baxa meelaha qashinka lagu gubo iyo kuwa lagu maareeyo (*treatment*) qashinka halista ah.

3.5 Hawraarta Siyaasadeed ee Xakamaynta Dulinka:

Dulinnada waxa ay isticmaalaan/kutarmaandeegaanno kala duwan oo xiran oo ay ku nooladaan, haddii ay yihiin kuwo dad-samee ah iyo kuwo dabiici ahba. Sidaa daraaddeed, dadaallada lagu xakamaynayo waa in lala beegsadaa degaanada ay ku nool yihiin ee ay aadka ugu kobcaan, halkii la beegsan lahaa dhammaan meelaha kala duwan ee ay ku nool yihiin, taas ayaana ugu muhiimsan marka la eego cilmiga cudurrada faafa, gaar ahaan Soomaaliya oo ay ka jiraan caqabado dhanka khayraad yarida ah . Istiraatiijiyadaha noocaas ah ee meel gaar ah lala beegsanayo waxaa ay u baahan yihiin in si weyn loo fahmo deegaanka dulinku ku nool yahay ee gudaha dalka iyo dabeecadaha iyo hab-dhaqannada dadka deggan degaanadaas ay ku dhaqmaan.

3.5.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. U-qareemayn & abaabul-bulsho iyo sharci-u-dejin – dhiirrigelinta mabaa'diidan oo loo adeegsado siyaasad-u-dejinta dhammaan hay'adaha, ururrada iyo bulshada rayidka ah ee u

habboon; dejinta ama sii-xoojinta xakamaynta loo adeegsado xeer-nidaaminta iyo shuruucda ku wajahan caafimaadka guud; iyo awoodsiinta bulshooyinka.

ii. Sii-xoojinta iskaashiga ka dhexeeya qaybta caafimaadka gudaheeda iyo kan kala dhexeeya waaxaha/qaybaha kale – tixgelinta dhammaan noocyada kala duwan ee iskaashiga dhex mara maamulka dowladeed iyo hay'adaha/ganacsiga gaarka loo leeyahay; qorsheynta iyo go'aan-qaadashada oo loo daadejiyo heerka maamul ee ugu hooseeya ee suuragalka ah; iyo xoojinta war-iskaarsiinta ka dhexaysa kuwa dejiya siyaasadda, maareeyayaasha barnaamijyada si loo xakameeyo cudurrada ka dhasha dulinka, iyo la-hawlgalayaasha kale ee muhiimka ah;

iii. In si iskudhafan loo maareeyo dulinka iyada oo ah hab istaatiiji ah oo loo kantaroolo dulinka iyada oo la hubinayo in si caqligal ah loo isticmaalo kheyraadka la haysto iyada oo la adeegsanayo habka iskumar loo kantaroolo cudurro badan; in la isku biiriyo hababka kantaroolidda dulinka ee loo isticmaalo waxyaabaha aan kiimikada ahayn iyo kuwa kiimikada ahba; iyo in la isdhexgeliyo tallaabooyinka kale ee lagu kantaroolayo cudurrada.

iv. Go'aan-qaadasho ku salaysan caddayn – in la qaato istiraatiijiyado iyo waxqabadyo lagu saleeyo deegaanka, dulinka, cudurrada faafa iyo khayraadka la heli karo, oo ay hagayso cilmi-baaris hawlgal, oo kuxiran in si joogto ah loola socdoloona qiimeeyo.

v. Dhisidda kartida – kobcinta kaabayaasha aasaasiga ah - khayraadka maaliyadeed iyoshaqaale dad ku filan oo heer qaran iyo heer deegaanba leh, kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwoku takhasusay caafimaadka guud iyo cayayaanka (*entomologists*), shaqaalaha xakamaynta dulinka iyo maaraynta barnaamijyada Maaraynta Dulinka ee Iskudhafan sameeyo xaaladda deegaanka, si ay u maareeyaan (IWM), si ku salaysan lafa-guris lagu

vi. Sii xoojinta iskaashiga lala leeyahay ganacsiga ku hawllan arrimahan, ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo nakh-shadeeyayaasha si loo horumariyo farsamaynta iyo ka-faa'iidaydiga nakh-shadaynta weelal biyaha lagu kaydiyo oo aanay soo geli kairn dulinka iyo sidoo kale guryo iyo goobo shaqo oo caafimaadka ku wanaagsan.

vii. Cayayaan-dile si ammaan ah loo isticmaalo – hubinta dadaallada ka-hortagga ah ee badbaadada oo ay ka mid yihiin taxaddarka marka la isticmaalayo sunta cayayaanka, hababka shaqada ee ammaanka ah oo ay raacaan kuwa buufiya sunta cayayaanka, iyo in si habboon loogu isticmaalo meelaha lagu buufinayo – waa in loo raacaa si waafaqsan dhabbe-tuseyaasha gaarka ah ee ay WHO u dhigtay isticmaalka cayayaan-dileyaasha iyo habaaracyadabed-qabka.

3.6. Hawraar Siyaasadeed – Dhiirrigelinta musqulo guri kasta yeesho, iyada oo loo marayo Fayadhowrka Dhammaystiran ee ay Bulshadu Hormuudka u tahay (CLTS)

Dowladdu waxaa ay bilaabi doontaa CLTS oo ah hab hal-abuur ku dhisan oo bulshooyinka loo abaabulo, si ay gebi-ahaanba u baabi'iyaan bannaan-ku-xaajo-gudashada/*Open Defecation* (OD). Habab hore oo loo wajihi jirey fayadhowrka ayaa bilawga horeba sheegi jirey in la xaqiijiyo jaangooyooyin sare oo bixin jirayna lacago dhiirrigelin ah. Laakiin arrintan ayaa badanaa keentey in si aan loo sinnayn loo qaato, dhibaatooyin la xiriira sii-jirtaanka muddada fog iyo in qayb ahaan un loo isticmaalo. Waxaa sidoo kale ay abuurtaydhaqan ah in lagu tiirsanaado lacagaha dhiirrigelinta ah. Taas beddelkeeda, CLTS waxaa uu diiradda saarayaa beddelidda hab-dhaqanka loo baahan yahay, si loo hubiyo in si dhab ah oo joogto ah xaaladda loo sii wanaajiyo. Dawladda ayaa maalgelin doonta abaabulidda bulshada halkii ay ka maalgelin lahayd qalabka la taaban karo (*hardware*), iyo in aan diiradda la saarin musqulo loo dhiso qoys kasta ee diiradda la saaro in la helo tuulooyin aan bannaanka lagu xaajo-gudan.

3.6.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. In la diyaariyo istiraatiijiyad qaran oo ballaaran oo la xiriirta CLTSiyo qorshe-hawleed uu la socdo kharashkii ku bixi lahaa oo taageeraya tijaabada iyo ku baahinta istiraatiijiyada ee dhammaan degmooyinka.
- ii. Samaynta qaab guud oo hay'adeed oo ku habboon oo Dawladaha Hoose door udub-dhexaad ah ka siinaya tijaabinta, ballaarinta iyo waaridda istiraatiijiyada CLTS.
- iii. Ka taageeridda bulshada in ay ogaato/barato ayna kor u qaaddo helidda agabka fayadhowrka, ayna ganacsiyada gaarka loo leeyahay ku dhiirrigeliso in ay wax ka qabtaan baahida jirta.
- iv. Ku dhiirrigelinta bulshada in ay dhistaan musqalahooda, iyaga oo isticmaalaya hantidooda. Waa in aanay jirin nakh-shado jaango'an oo kor dadka lagaga keeno: Dadku waa in ay iyagu go'aansadaan waxa ay dhisanayaan.
- v. Ka caawinta bulshada iyo hoggaamiyeyaasha dhaqanka in ay bulshada ka taageeraan in ay si taabagal ah uga shaqaysiiyaan ayna u dayactiraan musqalahooda.
- vi. Ku-dhiirrigelinta dadka in ay dabaaldeg u sameeyaan dhammaan bulshooyinka gaadha maqaamka in aanay jirin cid bannaanka ku xaajo gudata deegaankooda.
- vii. In la sameeyo korjoogtayn, dib-u-eegis iyo qiimayn joogto ah, si loo ogaado horumarka la gaaray iyo in muddo ka dibba la xaqiijiya maqaamka in aan bannaanada lagu xaajo gudan.

3.7 Hawraar Siyaasadeed oo ku saabsan kor-u-qaadista nadaafadda iyo fayadhowrka, iyada oo loo marayo fayadhowr dhammaystiran oo ay iskuulladu hormuud ka yihiin:

Dowladda waxaa ka go'an in ay dhiirrigeliso barashada iyo sinnaanta, iyada oo loo marayo WASH-kalaga fuliyo iskuulladaiyoyada oo korloo qaadayo heerka WASH-ka ee iskuullada, iyada hadafka laga leeyahay uu yahay hubinta in iskuul kasta oo cusub ama horey uga jirey heer kasta oo waxbarasho uu leeyahay musqulo shaqaynaya, carruurta u roon, u kala gaar ah gabdhaha iyo wiilasha, oo mar kasta laga helayo tas-hiilaad loogu tala-galay maaraynta nadaafadda fayadhowrka, saabuun iyo biyo lagu gacmo dhaqdo.

3.7.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed

- i. Bixinta tiro biyo nadiif ah oo dadka ku filan oo loo isticmaalo cabid iyo gacmo-dhaqasho ka dib marka la soo saxaroodo iyo ka hor inta aan wax la cunin, cuntada la karin iyo kuwo loo isticmaalo nadaafadda shakhsiga ah.
- ii. Bixinta biyo dadka ugu filan nadiifinta dhismaha iskuulka, nadiifinta/socodsiinta musqulaha, nadiifinta weelasha cuntada (oo lagu isticmaalo barnaamijyada quudinta iskuulka) lagu isticmaalay.
- iii. Bixinta/dhisidda musqulo u kala gaar ah labada jinsi (yacni musqulo u kala gaar ah wiilashaiyo gabdhaha), dad ku filan, carruurta u roon, si wanaagsan u qalabaysan, si wanaagsan gacanta loogu hayo oo dhaqanka waafaqsan.
- iv. In iskuulka laga dhiso naadiyo ama golayaal ay carruurtu leeyihiin, si ay u noqdaan is-beddel-doonka iskuullada/goobaha waxbarashada ku xira bulshada oo bixiyana agabka u habboon oo sida boostarro, wax-ku-qorista/sawiridda derbiyada, farriimo-dirista, oo qabanqaabiya dhacdooyin sida tartamo isboorti/ciyaaro.
- vi. Dhiirrigelinta nadaafadda shakhsiga ah iyo tan iskuulka gaar ahaan gacmo-dhaqashada shakhsi ahaan ama koox ahaan.
- vii. Hirgelinta tallaabooyin looga hortegayo iyo/ama lagu xakamaynayo cudurrada la xiriira WASH-ka, sida baaritaanno caafimaad oo joogto ah, ololeyaal goryaan-ka-dilis, nafaqo dheeri ah, iwm.

CUTUBKA 3

KU-XIRIDDA WASH-ka QAYBAHA KALE

Ma jiraan siyaasado iyo qorshe-hawleed cad oo loogu talogaley biyaha iyo fayadhowrka ee tas-hiilaadka caafimaadka iyo dugsiyada aasaasiga ah. Ma jirto xog la isku hallayn karo oo

tilmaamaysa xaaladda WASH-kaeetas-hiilaadka caafimaadka iyo Iskuullada. Soomaaliya kama jiro hab la tijaabiyay ama loo aqoonsaday in uu yahay habka ugu wanaagsan; sidaa daraaddeed, waxaa loo baahan yahay in la sameeyo hab ka shaqayn kara deegaankan. Ku-daridda tas-hiilaadka WASH-ka ee lagu daray qaybta iskuullada ardayda u roon ee ololaha ‘Ku-noqoshada Iskuulka’ ayaa laga yaabaa in ay dhaliso xiiso dheeri ah oo loo hayo iyo taageero ay helaan hawlaha WASH-ka ee iskuullada.

Caddayn caalami ah oo aad u xooggan ayaa loo hayaa sida ay isugu xiran yihiin fayadhowrka, nadaafadda, caafimaadka iyo nafaqada. Fayadhowrka iyo nadaafadda wanaagsan keliya si aad u weyn uma yaraynayaan halista cudurrada iyo dhimashada ay keenaan cudurrada ugu waawayn ee dilaaga ah sida shubanka, duumada (malaariyada) oof-wareenka, ee waxaa sidoo kale la ogaaday in ay yarayso ma-korenimada iyo halis loo galo caatoobid. Sidaa daraaddeed, hab-dhaqannadafayadhowr iyo nadaafadeed ee wanagsan ayaa sidoo kale ku xiran raadadka inta uu qofku nool yahay iyo jiilasha dambe ee fahamka waxbarashada, dhaqaalaha soo gala iyo yaraynta saboolnimada. Caqabadaha ugu waawayn iskudhafidda WASH-ka, Caafimaadka iyo Nafaqada waxaa ka mid ah yaraanshaha maaliyad, kartida, sida ay howsha u danaynayaan iyo aqoonta ay shaqaaluhu u leeyihiin waaxaha, isuduwidada iyo hoggaaminta dhammaan heerarka kala duwan oo ah mid aan dadka ku filnayn.

4.1 Ujeeddooyinka Siyaasadeed ee Gaarka ah:

- i. In la sii wanaajiyo tas-hiilaadka u baahan in lagu saleeyokala duwanaanshaha labada jinsi, u roon carruurta iyo biyo nadiif ah, fayadhowr iyo nadaafad oo ay yeeshaan xarumaha dadwaynaha ka dhexeeya, si caafimaad wanaagsan iyo bed-qab ay u helaan carruurta iskuullada, bukaanada, iyo bulshooyinka ugu dambayn 2025.
- ii. In la dhiso kartida shaqaalaha ee looga baahan yahay sii wanaajinta adeeg-bixinta biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda oo ka tarjumaya baahiyaha kala duwan ee labada jinsi, una roon carruurta.
- iii. In bulshooyinka lagu qalqaaliyo ka-qaybgalka qorshaynta, dhisidda, isticmaalkaiyo gacan-ku-haynta tas-hiilaad biyo iyo fayadhowr oo u fudud kuwa isticmaala oo ay yeeshaan hay’adaha bulshada ka dhexeeya.

4.2 Hawraar Siyaasadeed: Ku-xiridda qaybta WASH-ka Qaybaha kale.

Dowladda ayaa ka shaqaynaysa xaqiijinta SDGs-ka la xiriiira WASH-ka (Yoolka 6aad). Tani waxaa ay u baahanaysaa in iskaashi iyo isgarab-qabsi lala yeesho qaybta la xiriirta WASH-ka, sida caafimaadka, nafaqada, adkaysiga, waxbarashada, deegaanka, jinsiga (*gender*) iyo xuquuqaha aadanaha iyo qaybaha kale.

4.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed

- i. Bixinta madal wax lagu kala barto, aqoonna la isku weydaarsado ama wadaago – oo ay ka mid tahay wadahalaga laga yeesho samaynta xiriirrada u dhexeeya tallaabooyinka wax looga qabanayo xaaladaha degdegga ah iyo kuwa horumarinta ee WASH-ka, iyada oo loo marayo waxqabadyo dhisaya adkaysiga bulshooyinka ay dhibaataadu soo gaartay.
- ii. Hubinta in waxqabadyada WASH-ku ay la jaanqaadayaan dhabbe-tuseyaasha siyaasadeed, jaangooyooyinka farsamo ee biyaha iyo fayadhowrka ee hadda jira, iyo waajibaadyada sharciga ee xuquuqaha aadanaha ee dawladda ugu habboon.
- iii. Hubinta ku xiridda WASH-ka ee adeegyada aasaasiga ah ee daryeelka caafimaadka, istiraatiijiyada daryeelka caafimaadka ee bulshada ku salaysan iyo tababaridda shaqaalaha caafimaadka ee bulshada (shaqaalaha caafimaadka ee bulshada ee dheddiga ah).
- iv. Hubinta in kor-u-qaadista nadaafadda la dhexgeliyo/lagu dhafo waxqabadyada quudinta carruurta yaryar iyo kuwa roon-roon ee heerarka xarumaha caafimaadka iyo bulshadaba.
- v. Hubinta in adeegyada biyo-qaybinta iyo fayadhowrka oo si ammaan ah loo maareeyay laga helo tas-hiilaadka waxbarashada tooska ah iyo tan dadban oo ay ka mid yihiin Madrisooyinku/dugsiyadu
- vi. Hubinta in adeegyada WASH-ka si fudud looga heli karo xabsiyada, saldhigyada booliska iyo meelaha kale ee dadka lagu xiro.

CUTUBKA 4

MAALIYADSIINTA QAYBTAWASH-ka

Waa ay adag tahay in la fahmo sida maaliyad loo siiyo QaybtaWASH-ka ee Galmudug. Haseyeeshee, waxaa jira afar ilood sida tariifadaha (*tariffs*), gargaar la siiyo, ganacsiga gaarka ah iyo cashuur. Maaliyadda ay ka hesho cid kale (*external finance*) ayaa door muhiim ah ka qaadata kobcinta kartida iyo bixinta adeegyada biyaha iyo fayadhowrka. Haseyeeshee, ma jiro tirakoob (istaatistik) ama macluumaad ku saabsan sida uu yahay gargaarka ay cid kale ka hesho qaybta biyaha iyo fayadhowrka ee Soomaaliya.

Ma jirin dareen gaar ah oo diiradda lagu saarayay bixinta maaliyad dadka ku filan oo lagu taageerayo in adeegyadaWASH-ka oo si joogto ah lagu bixiyo Soomaaliya. Qabanqaabooyinka maaliyadsiin ee waqtigan ayaa ku guuldarraystay in ay xaqiijiyaan horumar dhab ah oo lagu sii wanaajinayo in si joogto ah loo helo adeegyada biyaha ama fayadhowrka.

Bixinta adeegyada iyo tas-hiilaadka WASH-ka waxaa ay u baahan yihiin maalgelin mug leh iyo in ay wax ku biiriyaan shakhsiyaadka, qoysaska, bulshooyinka iyo dawladaha. Caqabada ugu wayn ee haysata in si joogta ah loo bixiyo adeegyada WASH-ka waxay tahay, in ay hoosayso qoondaynta maaliyadeed ee qaybta WASH-ka loogu talagalay, iyo tariifooyinka oo aan lagu sargoyin dhaqaalaha lagu bixiyo adeegyada.

Siyaasaddan oo uu la socdo qorshaheeda fulinta waxaa ay salka u dhigaysaa diyaarinta istiraatiijiyado cad oo lagu doonayo in maaliyad loogu helo qaybta iyada oo la adeegsanayo hab-Wadakoobaya qaybta oo dhan.

4.1 Ujeeddooyinka siyaasadeed ee gaarka ah waa:

- i. In la soo rogo hab ku wada baahsan qaybtaWASH-ka oo dhan iyo in laga guuro waxqabadyada gurmada degdegga ah ee kala gaar-gaarka ah ee loo gudbo in maaliyadda hal meel la isugu keeno;
- ii. In la diyaariyo hab maaliyad joogto ah loogu helo adeegyada biyo-qaybinta iyo fayadhowrka magaalooyinka oo ay ka mid yihiin kharashaadka hantida iyo kuwa soo noqnoqda iyo in la sii wanaajiyo sida maaliyad ahaan ay isu wadi karaan adeeg-bixiyeyaasha magaalooyinka ku bixiya adeegyada biyaha iyo fayadhowrka;
- iii. In la abaabulo maaliyad si joogto ah fayadhawr dadka ugu filan, in la kordhiyo adeegyada biyo-qaybinta iyo fayadhowrka miyiga;

- iv. In la diyaariyo istiraatiijiyad maaliyadaysan oo ku fadhida mabaa'diida saliimka ah ee maaraynta maaliyadda si ku salaysan mabda'a ah in si saamigal ah loo qaybsado kharashka ku baxa waxyaabaha la taaban karo (*goobaha biyaha laga haansado/musqulaha*) iyo waxyaabaha aan la taaban karin (*tababaridda, kartidhiska, Korjoogteynta & Qiimaynta, iwm*).
- v. In abaabul loo galo maaliyad fayadhwarka dadka ku filan oo si toos ahna loogu qoondeeyo in lagu maalgeliyo waxqabadyada aan la taaban karin (*soft-ware*) oo ay ka mid yihiin dhinacyada kala duwan ee waxbarashada nadaafadda, wacyigelinta iyo abaabulka bulshada
- vi. In la soo rogo istiraatiijiyado khayraad mug leh loogu qoondeynayo gobollada, degmooyinka ugu nugul, iyada oo la adeegsanayo tilmaamayaasha saboolnimada, suuragalnimada afooyin dabiici ah, ammaandarro, sida ay u dhacayaan cudurrada iyo dhimashada, gaar ahaan dhimashada carruurta 5 sano jirka ka yar;

4.2 Hawraarta Siyaasadeed ee Maaliyad-siinta ee 1aad: Waaridda adeegga iyada ooloo marayo qaybsashada kharashka

Dhammaan nidaamyada biyo-qaybinta iyo fayadhowrka ee magaaloyinka waa in ay ku shaqeeyaan mabaa'diida qaybsashada kharashaadka iyada oo islamarkaasna la hubinayo in adeegga loo bixiyo si taabagal ah, hufan oo joogto ah. Macaamiishu waxaa ay diyaar u noqonayaan in ay iska bixiyaan kharashka biyahahaddii adeeggaloo bixiyo si la isku hallayn karo – waxaa arrintaa daliil u ah xaqiiqda ah in qaar badan oo ka mid ah macaamiisha ay biyahooda ka iibsadaan ganacsatada biyaha iibisa.

4.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i. Dawladdu waa in ay dejisaa Siyaasadda Tariifadaha oo isku jaango'an oo qiimaha biyaha lagu iibiyo ku saleynaysa xaaladda bulsho-dhaqaale ee dadwaynaha
- ii. Marka la dejinayo tariifadaha waa in la iska ilaaliyaa qiime-u-goynta biyaha ee siyaasadaysan.
- iii. Macaamiisha helaysa adeegga waa in ay bixiyaan kharashka looga baahan yahay xaqiijinta jiritaanka adeegga ee muddada fog.

- iv. Dowladdu waa in ay soo rogtaa habab isugudhafan sida: iskaashiga maamulka iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo hababka suuq-gaynta ee bulshada loogu daneynayo (*social marketing approaches*) si ganacsiga gaarka loo leeyahay awood loogu siiyo in ay ku lug yeeshaan maalgashiga adeegga biyaha, iyo fayadhowrka.
- v. Dawladdu waxaa ay si tartiib-tartiib ah faraha ugala bixi doontaa maaliyadsiinta, kashaqaysiinta iyo dayactiridda nidaamyada si awood loogu siiyo in ay diiradda saarto mashaariicda waawayn ee biyaha iyo fayadhowrka.
- vi. Nidaamyada qaybinta biyaha ayaa la dayactiri doonaa (taas oo ay ka mid tahay ogaanshaha biyaha daadanaya iyo dayactirkooda), waxaa la soo celin doonaa biyo-gelinta guryaha, waxaana la sii wanaajin doonaa habka qaan-sheegashooyinka, hawlaha ganacsiga iyo maaraynta macaamiisha si loo hubiyo in ay maaliyad ahaan macquul yihiin adeegyada la bixiyay.
- vii. Shaqaalaha ayaa lagu tababari doonaa soo-saaridda, qaybinta biyaha (soo-ogaanshaha biyaha daadanaya iyo dayactirkooda), cabbiridda isticmaalka biyaha ee macaamiisha, nidaam qaan-sheegad kombuyutar lagu diyaariyo, iyo hawlaha ganacsi iyo maaraynta guud.
- viii. Adeeg-bixiyeyaasha biyaha iyo fayadhowrka waxaa ay tixraaci doonaan tilmaamayaasha ku cad habka adeeg bixinta caalamiga bartilmaameedka aheeShabakadda *International Benchmarking Network of Water and Sanitation Utilities* (IBNET) biyo-qaybinta si ay u korjoogteeyaan una qiimeeyaan adeegyada biya qaybinta iyo fayadhowrka.

CUTUBKA 5

KU-LUG-LAHAANSHAHA GANACSIGA GAARKA LOO LEEYAHAY

Nimaadyada Qaybinta Biyaha/*Water Supply System* (WSS) iyo Tas-hiilaadka iyo Adeegyada Fayadhowrka oo ilaa laga soo gaaray 1991 ay dawladdu maamulaysay ayaa markaaba ahaa kuwo

ciriiri maaliyadeed uu haystay oo aan dadka ku filnayn, dhibaato soo gaartay iyo dayactir la'aan ku timid. Waxaa ay durba noqdeen kuwo aan shaqaynin 20kii sano ee la soo dhaafay. Tas-hiilaadka WSS iyo Fayadhowrka ma helin maaliyad dowladeed iyo sidoo kale maaliyad laba-geesood ah iyo mid gaar ah oo mug leh.

Shirkadaha ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa kobcay muddadaas waxaana ay buuxiyeen kaalintii dawladda, iyaga oo bixiyay adeegyo Biyo iyo Fayadhowr. Ganacsi-abuurayaal ku noolaa qaybaha kala duwan ee dalka ayaa dhisay berkado, qoday ceelal riig, gaar loo leeyahay, oo adeegyo ku bixiyay guud ahaan magaalooyinka waawayn oo ilaa xadna sii wanaajiyay hawlihii WSS.

Nidaamyo uu maamulo ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa bixiya biyo ilaa xad ay wanaagsan tahay tayadooda nadaafadeed, taas oo ah mid ka duwan sida ay xaaladdoodu tahay, nidaamyada miyiga ee ay bulshooyinkadeegaanku ay laf-ahaantooda maamulaan. Nidaamyada uu maamulo ganacsiga gaarkalooleyahay waxay bixiyaan biyo lagu kala iibiyo US\$5 iyo US\$15 halkiimitir-kuubo (cu. m) xilli-roobaadka iyo xilliga jiilaalka, sida ay u soo kala horreeyaan. Marka la barbardhigo sharikadaha gaarka loo leeyahay ee ka jira dalalka soo koraya ayaa waxaa ay badidoodu biyaha ku iibiyaan US\$ 0.4 iyo US\$ 4.5 halkii mitir-kuubo (cu. m) celcelis ahaan, taas oo su'aal gelinaysa caddaaladda ay helayaan bulshooyinka saboolka ah iyo kuwa la fogeeyo.

5.1 Ujeeddooyin siyaasadeed oo gaar ah:

- i. In ganacsiga gaarka loo leeyahay lagu dhiirrigeliyo ka-qaybgalka bixinta adeegyada la xiriira biyaha iyo fayadhowrka, iyada oo loo marayo iskaashi ka dhexeeya Dawladda iyo shirkadaha ganacsiga gaarka loo leeyahay.
- ii. In ganacsiga gaarka loo leeyahay lagu dhiirrigeliyo in ay wax ku biiriyaan soo-iibinta alaabo iyo adeegyo tayadooda la xaqiijiyay, sida qalabka dhismaha iyo qalabka dayactirka, bamamka biyaha iyo tubbooyinka biyaha, iwm.
- iii. In la xoojiyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyada oo loo marayo wadahadal, talo iyo caadooyinka, sidoo kale habraacyada ku habboon ee ka wada-shaqaynta mashaariicda WASH-ka;

5.2 Hawraarta Siyaasadeedee ku saabsan Ganacsiga Gaarka Loo Leeyahay: Ganacsiga gaarka loo leeyahay oo la kobciyo, si ay u bixiyaan adeegyada WASH-ka

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay rumaysan tahay in ganacsiga ee gaarka loo leeyahay uukhiirad farsamo, mid maarayn iyo farsamooyin cusubba uu keeni karo iyo in uu sii wanaajin karo hufnaanta qaybta ee dhinacyada hawlqabadka iyo isticmaalka hantida la maalgelinayo. Ganacsiga gaarka loo leeyahay waxaa uu hanti badan ku maalgelin karaaadeeggabiyahaiyofayadhawrka, ama waxaa uu haystaa fursad uu dhaqaale kaga helo suuqyada raasamaalka (*capital markets*). Ganacsiga gaarka loo leeyahay oo la kobciyo si uu u bixiyo adeegyada, waxaa ay hoos u dhigi kartaalacagta ay dowladdu ku kabto qaybtaWASH- ka ama waxaa lacagtaas laga soo weecin karaa kooxaha hadda helaya adeegga, waxaana loo weecin kara kuwa saboolka ah iyo kuwa aan adeegga helin. Waxaa ay sidoo kale qaybtaWASH-ka ka ilaalin kartaa faragelin siyaasadeed oo muddada dhow lagu sameeyo sida ay u shaqeeyaan khadamaadka waxaana ay yarayn kartaa fursadaha ay ku soo farageliyaan kooxaha danleyda ah ee awoodda leh, iyada oo khadamaadka ka dhigaysa kuwa u dhega- nugul baahiyaha iyo waxyaabaha ay doorbidayaan macaamiishu.

5.2.1 Tallaabooyinka Siyaasadeed:

- i.** Waa in la dhiirrigeliyaa in adeegyadu ay ganacsatadu bixiyaan, iyada oo loo marayo dib-u-habayn lagu sameeyo xeer-nidaamiyeyaasha ku habboon oo kala saara adeeg-bixinta, siyaasad-dejinta iyo xeer-nidaaminta oo dhiirrigeliyana maalgelinta gaarka ah.
- ii.** Iskaashiga Dawladda iyo Ganansatada (PPPs) ayaa la dhiirrigelin doonaa, si mid kasta uu midka kale ugakaabo xirfadaha, awoodaha ama hawlaha ka dhiman.
- iii.** Iskaashiga Dawladda iyo Ganacsiga Gaarka loo leeyahay (PPPs) ayaa lagu dhiirrigelin doonaa dakhli-ururinta, soo-cabbiridda (*metering*), adeegyada WSS iyo maalgelinta raasamaalka kharashka badan ee maaraynta qashinka. Qaab guud oo qandaraas iyo xeer-nidaamin ah ayaa la diyaarin doonaa, si loo hubiyo ka-qaybgalka ganacsiga gaarka loo leeyahay.
- iv.** Ganacsiga gaarka loo leeyahay waa in uu si wanaagsan wax uga qabtaa culaysyada ka jira sida adeegyo biyo iyo fayadhowr loo siinayo dadka saboolka ah, uuna dedejiyaa sida uu adeegga ugu baahinayo deegaannada aan si ku filan looga helin, isaga oo sii wanaajinaya sida maaliyad ku filan uga soo noqon karto iyo sida kharashka adeegga ay dadka isaga bixin karaan iyo in uu adeegyada u nakh-shadeeyo, si ay u dabooli karaan baahiyaha gaarka ah ee macaamiisha saboolka ah. Qabanqaabooyinka noocaas ah waxaa ay u baahan yihiin iskaashi dhow oo ay ka yeeshaan hay'adaha nidaaminaya, Dawladaha

Hoose, ganacsiyada gaarka ah ee adeeg-bixiyeyaasha ah, bulshooyinka saboolka ah iyo NGO-yada la shaqeeya.

- v. Marka danaha dadka saboolka ah ay halis gelayaan, Dawladda waa in ay adeeg-bixiyeyaasha biyaha iyo fayadhowrka siisaa lacag kab ah.

CUTUBKA 6

NIDAAMKA MAARAYNTA XOGTA QAYBTA WASH-ka

Xog la isku hallayn karo oo aan la heli karin ayaa sii adkaynaysa in lafa guris habboon lagu sameeyo qaybta WASH-ka waxaa ay taasi nusqaan weyn ku keeneysaa in la qaato go'aan ogaal ku dhisan. Waqtigaan ma jirto xog-keydsan (*database*) oo iskudhafan oo iswaafaqsan dalka oo dhan koobaysa oo ku saabsan biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda. Sidaa daraaddeed, waxaa jira ilo kala duwan oo xogta laga helo, oo ay ka mid yihiin sahammo muunadahaan (*sample surveys*) loo sameeyey iyo warbixino qiimayn ay sameeyeen hay'adaha iyo Dokumentiyada Barnaamijka Dalka ee UNICEF, FAO, AfDB, iwm. Xogta kayd-san ee keliya ee dalka oo dhan koobaysa ee hadda la heli karo waxaa ay ku tiirsantahay sahammada muunad ahaanta (*sample surveys*) loo sameeyey waxaana ay leedahay nusqaamo muuqda maaddaamaa'anay si buuxda u tilmaami karin xaaladda dalka oo dhan, gaar ahaan marka ay timaaddo tan WASH-ka. Waxaa loo baahan yahay in sahan ballaaran lagu sameeyo baahiyahaas, oo ka dhacaya dhammaan gobollada. Tani waxaa ay keeneysaa in la ogaado sida ay hadda tahay xaaladda qaybta WASH-kawaxaana lagadhigan karaa marjic laga ambaqaado, iyada oo la ogaanayo xaaladda dhabta ah ee sida aydadku u helayaan biyo nadiif ah iyo fayadhowr la sii wanaajiyey, xaaladda ay ku sugan yihiin hantida hadda jirta iyo tayadeeda, sida tayada goobaha biyaha laga dhaansado, tayada biyaha, musqulaha iyo wax-soo-saarka mid kasta (*per capita yield*), gaar ahaan xilliyada uu wax-soo-saarku hooseeyo. Xaalad marjic ah oo la isku hallayn karo waxaa sidoo kale ka mid ahaanaya xog tiro-sheeg ah oo lagu soo saarayo daraasado muddo ka dibba lagu sameeyo aqoonta, dabeecadda iyo hab-dhaqanka (KAP), oo tilmaamaysa xaaladaha ka jira deegaannada kala duwan ee dalka, gaar ahaan deegaannada beylahsan/nugul.

6.1 Ujeeddooyinka Siyaasadeed:

- i. In la sameeyo Nidaam Maaraynta Macluumaadka WASH oo adag oo ka shaqeeya xog la isku hallayn karo oo qaybta WASH-ka ku saabsan ama siiya dhammaan daneeyeyaasha kala duwan oo ay ka midyihiin siyaasad-dejiyeyaasha, maareeyeyaasha barnaamijka, la-hawlgalayaasha, iyo deeq-bixiyeyaasha.
- ii. In la sii xoojiyo hababka (qabanqaabada hay'adeed oo ay ka mid tahay kobcinta kartida shaqaalaha), habraacyada, iyo geeddi-socodyada xog-ururinta ee hay'adaha dowladeed ee ay khuseyso dhexdooda.

- iii. Inlasoosaaro warbixinno muddaysan oo lafaguris ah ooaykamidyihiinka-soo-warbixinta jinsiga si ay wada-hawlgalayaashu u wadaagaan warbixinnada iyo xogta oo lagu kala saaray jinsiga.

6.2 Hawraar Siyaasadeed: Nidaamka Maaraynta Macluumaadka iyo Digniinta Hore

Dowladdu waxaa ay samayn doontaa nidaamka maarayn macluumaadka oo adag, ballaaran, si buuxda isugu dhafan, is-waafaqsan oo si wanaagsan la isugu duwey si uu u hago korjoogtaynta hirgelinta Siyaasadda WASH-ka oo uuna u qiimeeyo raadka ay reebto. Waxaa waajib ku ahaan doona dhammaan barnaamijyada, mashaariicda iyo la-hawlgalayaasha in ay macluumaadka iyo xogta soo siiyaan Qaybta WASH-ka. U-hoggaansamid la'aanteedana waxaa ka dhalan doonta hawsha iyo shuruudaha tixraaca ee ay ku shaqayso hay'adda ay khusayso uuislamarkiiba dib-u-eegis ku sameeyomaamulka ay khusayso isaga oo ka wakiil ah dawladdafederaalka ah ee Soomaaliya.

6.2.1 Tallaabooyin Siyaasadeed

- I. Dejinta qorshe istiraatiiji ah oo laxiriira nidaamka maarayntamacluumaadka WASH-kaoo uu la socdo kharashka ku baxaya iyo in lala wadaago daneeyeyaasha iyo deeq-bixiyeyaasha si ay u siiyaan maaliyad;
- II. U adeegsashada macluumaadka iyo caddaymaha WASH-ka ee dejinta siyaasadda, qorshaynta, korjoogtaynta iyo qiimaynta Qaybta;
- III. Dejinta siyaasadda macluumaadka ee qaybta WASH-ka iyo xoojinta kartida unugyada macluumaadka biyaha iyo fayadhowrka ee heer qaran iyo kuwa ka hooseeya heerka qaranka, si ay si taabagal ah ugu hirgelin karaan siyaasadda iyo qorshaha istiraatiijiga ah ee macluumaadka biyaha iyo fayadhowrka iyo qorshaha istiraatiijiga ah iyo dhisidda unugyada macluumaadka WASH-ka ee heer degmo;
- IV. Awoodda hannaanka macluumaadka ee qaybta WASH-ka ayaa la xoojin doonaa marka laga eego awoodda ururinta xogta iyo awoodda lafagurista, iyada oo la keenayo agab jaango'an iyo barnaamijyo-kombuyutar oo lagu maamulo xogta oo ay ka mid tahay shabakad *internet (portal)* oo laga baahiyo dhammaan xogta caadiga ah iyo xogta sharaxaadda ah (*meta-data*) ee la heli karo;

V. Nidaamyada macluumaadka qaybta WASH-ka ayaa la xoojin doonaa iyada oo isku dhafayonidaamyada xog-ururinta toosan (*vertical data collection*) iyo ka-waribixinta iyada oo la hubinayo in xogta lagu kala soocayo jinsiga, goobta iyo cunsurro kale.

VI. Kartida kooxaha farsamada iyo maamulka ee heer Federaal, Dawlad-goboleed, Gobol iyo Degmo ayaa la sii xoojin doonaa si ay si habboon u sameeyaan xog-ururin, lafa-guris iyo ka soo warbixin iyo sidoo kale dalbashada xogta iyo adeegsiga macluumaadka;

VII. Tiknolojiyado macluumaad iyo war-isgaarsiin (ICT) ku habboon ayaa la bixin doonaa si loo kordhiyo helidda iyo isticmaalka macluumaadka WASH-ka;

VIII. Khayraad ku filan ayaa la abaabuli doonaa loona qoondayn doonaa horumarinta macluumaadkaqaybta WASH-ka. Ugu yaraan 5% miisaaniyadaha barnaamijyada WASH-ka waxaa loo qoondayn doonaa xog-ururinta, isugaynta, lafagurista, korjoogtaynta waxqabadka, dib-u-eegista, qiimaynta iyo daraasadaha hawlgalka;

CUTUBKA 7

KOBCINTA ISUDUWIDDA IYO WADA-HAWLGALKA

Wax qabadyada WASH-kaayaa asal ahaanba ah kuwo waaxo kala duwan khuseeya. Ugu yaraan waxaa ay khuseeyaan Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha, Wasaaradda Waxbarashada, Dhaqanka iyo Tacliinta Sare, oo mas'uul ka ah hubinta tas-hiilaadka gacmo-dhaqashada iyo musqulo ku yaalla iskuullada, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, oo ka mas'uul ah waci-gelintanadaafadda iyo fayadhowrka iyo hubinta in biyo iyo fayadhowr habboon laga helotas-hiilaadka caafimaadka, Wasaaradda Hawlaha Guud oo ka mas'uul ah hubinta in nidaamyada tubooyinka biyaha iyo fayadhowrka ay jiraan ayna shaqeeyaan. Arrintan ayaa ka dhalanaysa in qabanqaabooyinka hay'adeed ay ahaadaan kuwo kakan maaddaama hay'adaha dowladda ee ka mas'uullka ah iyo siyaasadaha u kala degsan ay badanaa kala gaar u yihiin biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda, taas oo iskaashiga Wasaaradaha dhexdooda ka dhigeysa mid adag.

Culaysyada la xiriira lahaanshaha iyo waaridda khayraadka iyo tas-hiilaadka iyo qeexidda mas'uuliyadaha iyo miisaaniyadaha waaxaha kala duwan ayaa badan. Tusaale ahaan yaa laga doonayaa in uu bixiyo kharashka caadi ahaanta badan ee looga baahan yahay kharashaadka hantida looga baahan yahay kaabayaasha fayadhowrka magaalooyinka Wasaaraddee ayaa ay tahay in ay taageerto kharashka badan ee lala xiriiriyo kordhinta biyo-qaybinta? In aanaycaddayn jawaabaha su'aalahan ayaa laga yaabaa in ay ka dhalato in aanay wada-jaanqaadin barnaamijyada iyo in ay dhacdo in isku wax lagu mashquulo.

Cunsurro kaladuwan, oo ay ka mid yihiin caadooyinka dhaqameed ayaa sidoo kale keenaya in ay jilicsanaato dalbasho ay macaamiishu dalbadaan adeegyada WASH-ka – Dhab ahaan, dhiirrigelinta dalbashada adeegyada WASH-ka haddii ay yihiin maalgelinta iyo isticmaalka musqul, ama gacmo-dhaqashada ka dib marka la saxaroodo iyo ka hor inta aan wax la cunin ama meel nadiif ah oo lagu keydiyo biyaha qoyska –ayaa weli ah culeys weyn. Dalabaadka hooseeya ee adeegyada WASH-ka ayaa dhinaca kale horseedi kara in mudnaanta siyaasadeed

ee la siiyo ay hoosayso, sidaa daraaddeedna culays yar la saaro isku-xirnaanta wasaaradaha. Ugu dambayn, iskaashiga waaxaha kala duwan ayaa noqon kara mid culayskiisa leh xataa waqtiyada ugu wanaagsan.

Baahida loo qabo iskaashi dhow oo ay yeeshaan Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, iyo Wasaaradaha iyo Hay'adaha Kale ee Dawladda ee u habboon, Deeq-bixiyeyaasha iyo Ururrada Aan Dawliga Ahayn, Ururrada bulshada rayidka ah iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa lagamamaarmaan u ah xaqiijinta ujeeddooyinka siyaasadeed. Inkasta oo ay Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha iyo Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ay mas'uuliyaddoodu tahay hubinta hawlaha aasaasiga ah ee la xiriiira WASHk-a, marka qaab-dhismeedyada hay'adeed ama hay'adaha u habboon aanay qaban karin, ayaa arrinta la qabanayaa iyada oo ay caawinayaan hay'adahaas iyada oo ujeedku yahay in waqtiga ku habboon ay ka soo bixi doonaan waajibaadyada lagu saaray shuruucdii lagu dhisay.

7.1 Ujeeddooyinka Siyaasadeed ee Gaarka ah

- i. In la abuurto deegaan dadka u fududaynaya hawsha iyada oo loo marayo shuruucda ku habboon iyo iyada oo la bixinayo awoodaha lagamamaarmaanka u ah dhaqangelintooda.
- ii. In la bixiyo nidaam ka-warqab, qorshayn, korjoogtayn iyo kormeer laga soo bilaabo heer qaran ilaa heer deegaan.
- iii. In la sii wanaajiyo isuduwidda, isla-jaanqaadidda iyo is-waafaqsanaanta gargaarka bani'aadamnimada iyo kan horumarinta iyo la-hawlgelayaasha, hay'adaha hirgelinaya, bulshada rayidka ah iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay.

7.2 Hawraarro Siyaasadeed: Kobcinta Isuduwidda iyo Wada-hawlgalka qaybta WASH-ka

Qaab-dhismeedyo isuduwid oo cusub ayaa la dhisi doonaa, kuwaas oo beddeli doona dhammaan qaab-dhismeedyadiyo qaababka guud ee isuduwidda ee hadda jira oo uu ka mid yahay Nidaamka Kutlada (*The Cluster System*). Waxaa loo baahan yahay in laga shaqeeyo in laga heshiiyo qabanqaabooyinkan cusub. Shuruudaha Tixraaca iyo xubnaha heer kasta oo ka mid ah ayaa loo baahan yahay in la qoro lana ansaxiyo.

7.2.1 Tallaaboyinka Siyaasadeed:

- i. Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha ayaa qaadanaysa door hoggaamineed iyo mid ay ku xiriirineyso Dawladda iyo daneeyeyaasha waaxda biyaha halka Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ay mas'uuliyad taa la mid ah ay u qaadayso caafimaadka, nadaafadda iyo fayadhowrka.
- ii. Madasha Maaliyad-bixiyeyaasha WASH-ka waxaa ay ka koobnaan doontaa wakiillo sare

oo ka socda deeq-bixiyeyaasha wax ka badan \$5m sanadkii ku maalgeliya qaybta WASH-ka, kuwaas oo ay ka mid yihiin Xafiiska Qaramada Midoobay ee Isuduwidda Arrimaha Bani'aadamnimada, UNICEF iyo Wasaaradaha qaybta ku leh ee Federaalka. Wasaaradaha ka-mas'uulka ah Qorshaynta iyo Miisaaniyad-dejinta ayaa wakiillo ku lahaan doona madasha. Wakiillada ka socda maaliyad-bixiyeyaasha ugu waawayn waa in ay ahaadaan shakhsiyaad awoodi kara in ay bixiyaan ballanqaad maaliyadeed. Waxaa ay madashu ku kulmi doontaa Muqdisho laba jeer sanadkii.

iii. Guddiga Wasaaradaha Ka Dhexeeya ee Hagidda WASH-ka (IMWSC) ayaa la dhisi doonaa si uu u hoggaamiyo hagidda qaybta WASH-ka iyada oo ay hoggaaminayso Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha. Guddiga IMWSC ayaa hoggaamin doona isuduwidda, isla-xisaabtanka, is-waafajinta maaliyadaha la gelinayo, iyo ka guuridda habka kutlada iyo u guuridda Hab qaybta WASH-ka Wada Koobaya. Xubnaha guddiga oo eey ka midyihiin saraakiil Dawladeed, Deeq-bixiyeyaal, iyo Madaxa barnaamijyada Hay'adaha wax ku biirinaya Qaybta WASH-ka. Guddiga IMWSC waxaa uu sannadkiiba afar jeer ku kulmayaa Muqdisho.

iv. Guddiga IMWSC waxaa uu dhisi doonaa madal farsamo iyo koox-hawleedyo mowduucyo gaar ah u qaabilsan oo ka mas'uul noqda arrimaha farsamada iyo mowduucyada ugu muhiimsan sida biyo-qaybinta iyo bullaacadaha magaalooyinka, biyo-qaybinta miyiga, maaraynta qashinka, dhiirrigelinta nadaafadda, digniinta hore iyo gurmada degdegga ah, iwm.

v. Madasha farsamada waxaa ay diiradda saari doontaa arrimaha farsamada, ee ma-saareyso arrimaha maaliyadsiinta. Waxaa ay ka koobnaan doontaa wakiillo ka socda hay'adaha ka talo-bixinaya nakh-shadda barnaamijyada WASH-ka, halkii ay diiradda saari lahaayeen maaliyadsiintooda. Kutlada WASH-ka waa in ay ka mid ahaataa Guddigan. Hawsha ugu muhiimsan ee Guddigan waa isuduwidda – iyaga oo is-waafajinaya barnaamijyada ay taageeraan dhammaan hawl-fuliyayaasha, iyada oo la iska ilaalinayo in isku wax lagu mashquulo, iyada oo misna laga hortegayo isu-dheellitirila'aanta deegaannada ee dhinaca waxa la gelinayo, iyada oo haddana laga fogaanayo waxqabadyo iska soo horjeeda iyo hufnaan la'aan iska muuqata. Hawsha kale ee guddigan waa dejinta qorshe faahfaahsan, dib-u-eegista iyo qiimaynta qaybta WASH-ka. Madasha farsamadu ma qaadnayso wax go'aan ah oo la xiriira maaliyadsiin, waxaana ay bil walba ku kulmi doontaa Muqdisho.

QAYBTA 3AAD
QAABKA GUUD EE SHARCI, XEER-NIDAAMIN IYO
HAY'ADEED

Maamulka Qaybta WASH-ka ee Dowladda waa uu dhaafsiisan yahay Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha (MoEWR) ee waxaa uu gaarsiisan yahay hay'ado daneeyeyaal kale. Qaab-dhismeedka hay'adeed ee hay'adaha qaybta WASH-ka waa kuwo inta badan kheyraadkoodu yar yahay taas oo keenaysa in hay'aduhu ay sidoodii hore iska ahaadaan (*institutional inertia*). Shaqaale badan iyo nidaamyo maarayn oo badan oo loo baahnaa ayaan jirin. Doorarka ay hay'adaha dawladda ee kala duwan ay kala leeyihiin ma cadda waxaana marar badan dhacda in ay isku wax ku mashquulaan. Ma jiraan qaabab guud oo iswaafaqsan oo dhinacyada sharciga, xeer-nidaaminta iyo siyaasadda. Siyaasadaha iyo shuruucda la hayo ayaa weli qabyo- qoraal ah guud ahaan hay'adaha waxaana ay yihiin kuwo wada-jaanqaadi karin iyada oo aanay jirin qaabab guud oo loo sameeyo aiyo qiimayn si loo cabbiro horumarka la xaqiijiyay dhaqangelinta siyaasadaha.

Khayraadka biyaha oo si waarta loo maareeyo, adeegyada biyo-qaybinta magaaloooyinka iyo miyiga iyo sii-wanaajinta fayadhowrka iyo nadaafadda ayaa u baahan in la helo hay'ado iyo shuruuc waxtar leh oo wax ka qabanaya culaysyada sii koraya ee WASH-ka. Ujeeddada ugu weyn waa in la abuuro deegaan awood dadka u siin kara wax ka qabashada culaysyada hay'adaha adeeggaqaybta biyaha iyo fayadhowrka iyo in la xaqiijiyo ujeeddooyinka ku xusan dokumentigan Siyaasadda dhexdiisa.

Ujeeddooyinka gaarka ah waa:

- i. In la sameeyo doorarka iyo mas'uuliyadaha ay kala leeyihiin hay'adaha kala duwane ku hawlan hirgelinta Siyaasadda Biyaha iyo Fayadhowrka.
- ii. In la dhiso hay'ado nidaamiya maaraynta kheyraadka biyaha iyo caafimaadka deegaanka iyaga oo hubinaya isuduwidada, khayraadka oo caddaalad loo qaybsado, iyo ka-hortagga colaadaha.

Hawraarta Siyaasadeed ee Doorarka iyo Mas'uuliyadaha Hay'adaha:

Dawladda waxaa ay ku dadaashay in ay xoojiso ayna dib-u-habayn ku samayso qaybta WASH-ka iyo in ay ka dhigto mid firfircoon, karti leh, xooggan, lala-xisaabtamo oo waxqabad leh iyada oo loo marayo dib-u-habayn siyaasadeed iyo mid sharci, kobcinta hay'adaha iyo houmarinta kartida maaraynta iyonidaamyada.

Doorarka iyo Mas'uuliyadaha Hay'adaha

Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha ee Heer Federaal iyo Heer Dawlad-goboleed

Hawsha iyo Mas'uuliyadaha

- i. Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha/ *the Ministry of Energy and Water Resources* (MoEWR) waa hay'adda Dawladda uga mas'uulka ah biyaha ee heer

Federaal iyo heer Dawlad-goboleed. Hawlaheeda ugu waawayn waxaa ay diiradda saarayaan hubinta in muwaadiniinta ay helaan adeegyo biyo ku filan. Inkasta oo doorka dawladda ee ahaa Adeeg-bixiye weyn uu si tartib-tartiib ah isaga soo beddelayo oo uuu noqonayo mid isuduwid iyo nidaamin, haddana Wasaaraddu waxaa ay sii wadi doontaa mas'uuliyaddeeda ah in ay kormeerto khayraadka biyaha ee dalka.

- ii. Wasaaraddu waa in ay go'aamisaa ayna diyaarisaa siyaasad-hoosaadyo, shuruuc iyo in muddo ka dibba ay dib-u-eegis ku samayso siyaasadaha iyo shuruucda la dejiyay.
- iii. Wasaaraddu waa in ay mas'uul ka ahaataa isuduwidda iyo iskudhafidda Qaybta WASH-ka, qaybta-qorsheynta iyo waaxaha kale, qiimaynta barnaamijyada qaybinta biyaha iyo in maaliyad dad ku filan ay u soo hesho mashaariicda biyaha. Sixitaan bay halkan rabtaa
- iv. Wasaaradduwaa in ay ahaataa midda haysa oo hirgelineysana siyaasadaha iyo shuruucda biyaha. Waa in ay ahaataa awoodda guud ahaan looga dambeeyo biyaha iyo dhammaan arrimaha la xiriira.

Dib-u-habaynta Wasaaradda

Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha waxaa loo kala qaybin doonaa laba agaasin oo waawayn oo u kala qaabilsan Tamarta iyo Khayraadka Biyaha.

Agaasinka Khayraadka Biyaha/Heerarka Dawlad-goboleedyada

Maaraynta khayraadku waxaa ay u baahan tahay in la dhiso hay'ad taaba-gal ah oo u qaabilsan qabashada hawlaha muhiimka ah ee soo socda:

- i. Waa in la dhiso Agaasinka Biyaha oo ah mid wax walba u dhammaystiran yihiin oo ka kooban afar (4) waaxood oo heer sare ah oo Wasaaradda ka tirsan waana in ay kala ahaadaan:
 1. Waaxda Siyaasadda, Cilmi-baarista iyo Qorshaynta.
 2. Waaxda Biyo-qaybinta Magaalooyinka.
 3. Waaxda Biyo-qaybinta Miyiga.
 4. Waaxda Maaraynta Khayraadka Biyaha.
 5. Xarunta Saadaasha Fatahaadaha
- ii. Agaasinka Biyuhu waa in uu mas'uul ka ahaadaa korjoogtaynta sida loo hirgelinayo Siyaasadda Biyaha iyo hubinta in ujeeddoyinka siyaasadda lagu hirgeliyo waqtigii loo qabtay.
- iii. Marka la aasaaso Agaasinka Biyaha, dhammaan waajibiyaadyada iyo mas'uuliyadaha la xiriira biyaha waxaa qaban doona Agaasinkaas.
- iv. Marka ay gudanayso mas'uuliyadahaan, Wasaaraddu iyada oo u maraysa Agaasinka Biyaha waxaa ay si dhow ula shaqayn doontaa hay'adaha ku lug leh waxqabadyada la xiriira biyaha.
 - ☐ Gaar ahaan, agaasinka khayraadka biyaha waxaa uu mas'uul ka ahaan doonaa
 - ☐ Baaritaanka/sahaminta khayraadka biyaha,
 - ☐ Daraasaynta/qiimaynta khayraadka biyaha ee tiro iyo tayo ahaanba, korjoogtaynta iyo qiimaynta,
 - ☐ Raadinta khayraad maaliyadeed oo lagu bixiyo kharashaadka maaraynta khayraadka biyaha.
 - ☐ Xakamaynta wasakhoobidda (*pollution*) iyo waxqabadyada kale ee waaxaha ka dhexeeya (*cross-sectoral activities*) sida maaraynta meelaha biyo-qabatinka ah, qorshaynta iyo horumarinta/kobcinta.
 - ☐ Rukhsadaha dhammaan waxqabadyada la xiriira tas-hiilaadka bixiya biyaha oo ay ka mid yihiin soo-saaristooda, iibintooda, iwm.

□ Diyaarinta liis ay ku qoran yihiin dhammaan khubarada biyaha, daraasaynta shaqaalaha loo baahan yahay iyo diyaarintabarnaamijyo tababar oo lagu hubinayo in waaxdu ay haysato tiro khubarro ugu filan hirgelinta waxqabadyada kala duwan ee waaxda biyaha.

□ Daraasaynta baahiyaha iyo istiraatiijiyadaha looga faa'iideysanayo khayraadka biyaha ee soohdimaha ka tallawsan iyada oo iskaashi lagala yeelanayo hay'adaha biyaha ee dalalka kale ee deriska ah.

Xarunta Saadaasha Fatahaadaha/*Flood Forecasting Centre (FFC)*

Hawsha ugu weyn ee xarunta FFC waxaa ay noqonaysaa soo-saarista maalin kasta , mararka qaarna wax ka yar maalin gudaheed (marka ay jirto fatahaad) talooyin iyo warsideyaal loogu tala-galay goobaha adeegga saadaasha bixiya. Waa in goobo laga ilaaleeyo laga sameeyaa labada webi waana in la sameeyo goobo kale oo dheeri ah oo leh xiriirrada ka dhexeeya cabbirka joogga/biyahafataha (*stage/discharge rating relationship*).

Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada/*Ministry of Health and Human Services (MOH&HS)* ee Heer Federaal/Dawlad-goboleed

i. Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada (MOH&HS), waa in ay sii ahaataa tan ka mas'uulka ah dejinta Siyaasadda Fayadhowrka iyo Nadaafadda iyada oo u maraysa Waaxdeeda Caafimaadka Guud ee deegaanka. Waxaa ay sidoo kale mas'uul ka ahaanaysaa dejinta istiraatiijiyadahafayadhowrka.

ii. Sida adag ee ay isugu xiran yihiin adeegyada biyaha iyo fayadhowrka iyo sidoo kale caafimaadka guud daraaddeed, ayaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada waxaa ay door hoggaamineed ka qaadan doontaa korjoogtaynta dhinaca fayadhowrka iyo nadaafadda.

iii. Waxaa ay si dhow ula shaqayn doontaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha/Dawladaha Hoose oo ay weheliso Wasaaradda ka mas'uulka ah biyaha si ay u hubiso in barnaamijyada iskudhafan ee waxbarashada/wacigelinta biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda ay hirgeliyaan Dawladaha Hoose ee magaalooyinka iyo miyigaba si waafaqsan ujeeddooyinka siyaasadda.

iv. MoH&HS ayaa mas'uul ka ahaan doonta isuduwidda guud ee waxqabadyada fayadhowrka ee heer federaal iyo heer dawlad-goboleed.

v. MOH&HS iyada oo umaraysa Waaxdeeda Caafimaadka Guud waa in ay hoggaamisaa barnaamijyada fayadhowrka iyo nadaafadda, iyada oo iskaashi dhow kala yeelanaysa Wasaaradaha mas'uulka ka ah Biyaha, Dawladaha Hoose, Waxbarashada, iyo daneeyeyaasha kale ee muhiimka ah, oo ay ka mid yihiin ururrada Deeq-bixiyeyaasha, NGO-yada iyo Ururrada Bulshada Rayidka ah.

- vi. MOH&HSayaa mas’uul ka ahaan doonta bixinta adeeg bixinaya talo farsamo oo ku saabsan dejinta jaangooyooyinka aasaasiga ah ee ugu hooseeya iyo heerarka adeegga looga baahan yahay.
- vii. MOH&HS waxaa ay raadin doontaa ayna codsan doontaa maaliyado lagu fuliyo mashaariicda fayadhowrka oo laguna dejiyo shuruudaha lagu salaynayo qoondaynta maaliyadda qaranka, si ay u hubiso in sida ugu wanaagsan looga faa’iidaysto maaliyadaha lagu helay qaab deeq ama amaah ah ee loogu tala-galay barnaamijyada sii wanaajinta fayadhowrka.
- viii. MOH&HS waxaa ay si heer qaran ah ugu qareemayn doontaa sii wanaajinta barnaamijyada fayadhowrka.
- ix. MOH&HS waxaa ay mas’uul ka ahaan doontaa korjoogtaynta iyo qiimaynta waxqabadyada nadaafadda iyo fayadhowrka ee guud ahaan dalka.

Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Wasaaraddu ma laha doorar iyo mas’uuliyado cad oo la xiriira adeegyada biyo-qaybinta iyo nadaafadda iyo fayadhowrka magaalooyinka, deegaan iyo miyigaba. Dawladaha Hoose ayaa ah kuwa Wasaaradda uga wakiil ah degmooyinka waxaana uu sharcigu ku waajibinayaa in ay fuliyaan ujeedooyinka guud iyo kuwa gaarka ah ee deegaannadahoosyimaada. Dawladaha Hoose waa ay ku kala duwan yihiin kartida ay leeyihiin badanaanaba waa kuwo jilicsan. Aqlabiyaddoodu ma awoodaan in ay si dadka ku filan u qabtaan hawlaha iyo mas’uuliyadaha adeegyada biyo-qaybinta iyo sidoo kale fayadhowrka. Dadaallo lagu doonayo in lagu dhiso kartida Dawladaha Hoose ayaa hadda socda iyada oo loo marayo barnaamijka JPLG, oo Dawladaha Hoose awood u siin doona in ay muddada fog ka soo baxaan mas’uuliyadahooda.

Doorarka iyo Mas’uuliyadaha

- i. Wasaaradda Arrimaha Gudaha waa in ay ka mas’uul ahaataa abuurista unugyo gaar ah oo u qaabilsan maarayn khayraadka biyaha, adeegyada nadaafadda iyo fayadhowrka taas oo qayb ka ah waaxda arrimaha bulshada ee Dawladaha Hoose. Mas’uuliyadaha

Dawladaha Hoose ee dhinaca nadaafadda iyo fayadhowrka waa in ay ka mid ahaadaan:

- ☐ Bixinta kaabayaal bulshada (*communal infrastructure*) ka dhexeeya ee dhinacyada qorshaynta, barnaamij-diyaarinta, iyo maaliyadsiinta.
- ☐ Ka-shaqaysiinta iyo dayactiridda (gacan-ku-haynta) kaabayaasha (marka laga reebo kuwa ay ka shaqaysiinayaan/hawgeliyaan hay’ado madax-bannaani hoose leh).

- ☐ Dejinta tariifadaha, ururinta dakhliga adeegyada fayadhowrka ee aan la nidaamin.
- ☐ Gacan-ku-haynta caafimaadka guud iyada oo loo marayo waxbarashada, ka-hortagga wasakhaynta deegaanka iyo hababka xakamaynta.
- ☐ Fududaynta ku lug lahaanshaha bulshada ee barnaamijyada fayadhowrka.
- ☐ Fududeynta dhisidda iyo kobcinta kartida guddiyada Biyaha iyo Fayadhowrka ee Bulshada (*WASH Committees*).
- ☐ Korjoogteynta horumarka barnaamijyada fayadhowrka iyo waxqabadyada kale ee la xiriira ee golayaasha maamul ee degmooyinka.

Wasaaradda Hawlaha Guud ee Heer Federal/Heer Dawlad-goboleed

Waxaa jiri doona iskaashi dhow oo ka dhexeeya Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha, Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, iyo Wasaaradda Hawlaha Guud kaas oo la halmaala horumarinta kaabayaasha biyaha iyo fayadhowrka. Wasaaradda Hawlaha Guud ayaa ka mas'uul ah dhisidda iyo dayactiridda kaabayaasha biyaha iyo fayadhowrka ooay ka mid yihiin nidaamyada biyo-qaybinta magaalooyinka, meelaha ay biyaha roobku maraan, nimaamyada bullaacadaha iyo goobaha qashin-qubka ah.

Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga yo Horumarinta Dhaqaalaha

Waxaa jiri doona iskaashi dhow oo ka dhaxayn doona Wasaaradda Qorshaynta, Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha iyo Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, si ay u fududeeyaan waajibka dawladda ka saaran soo-raadinta iyo u-soo-helidda dhaqaale ku filan

oo noocyo kala duwan ah oo ay ka soo hesho ururrada deeq-bixiyeyaasha iyo la-hawlgalayaasha horumarinta si loogu fuliyo maalgelinta hantida raasamaalka ah, dayactiriddooda, tababaridda iyo karti-dhisidda qaybta WASHka. Intaas waxaa dheer, Wasaaradda Qorshayntu waxaa ay hormuud u noqon doontaa isuduwidda gargaarka caalamiga ah ee horumarinta waxaana ay bilaabi doontaa habka ku fidsan dhammaan qaybaha (SWAp) oo si nidaamsan loogu hormarinayo qaybta WASH-ka.

Wasaaradda Waxbarashada, Dhaqanka iyo Tacliinta Sare ee Heer Federaal/Heer Dawlad-goboleed

Wasaaradda Waxbarashada, Dhaqanka iyo Tacliinta Sare waxaa ay hormuud u noqon doontaa kobcinta istiraatiijiyadda fayadhowrka dhammaystiran ee uu hormuudka u yahay iskuulku, ka

hirgelinta WASH-ka ee iskuullada iyo sidoo kale abuurista horyaallada WASH-ka ee naadiyada carruurta iyada oo loo marayo guddiyada waxbarashada bulshada.

Wasaaradaha Beeraha iyo Xanaanadda Xoolaha ee Heer Federaal iyo mid Dawlad-goboleed

Wasaaradaha Beeraha iyo Xannaanda Xoolaha waxaa ay Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha si dhow ugala shaqayn doonaan go'aaminta biyaha looga baahan yahay waraabka, beeraha iyo xoolaha.

Agaasinka Hay'adda Arrimaha Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada,

Waxaa uu mas'uul ka noqon doonaa khariidadaynta degaannada biyo-qabatinka ah, togagga, webiyada iyo balliyada iyada oo kaashanaysa Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha

Golayaasha Degmooyinka ee Magaalooyinka/Dawladdaha Hoose

- i. Golayaasha deegaanku waa in ay mas'uul ka noqdaan hirgelinta qorsheyaasha khayraadka biyaha, ilaalinta iyo dhowridda khayraadka dabiiciga ah ee heer degmo, dejinta shuruuc-hoosaad oo ku saabsan maaraynta khayraadka biyaha, iyo xallinta khilaafaadka si waafaqsan shuruucda iyo xeer-nidaamiyayaasha u dhigan.
- ii. Guddiga WASH-ka ee Degmada ayaa si sharci ah loo dhisi doonaa, kaas oo ka kooban daneeyayaasha qaybta biyaha iyo fayadhowrka (WASH-ka) si ay hawlahaan kor lagu xusay uga fuliyaan degmada.

Guddiyada WASH-ka ee Bulshada

- i. Bulshooyinku waxaa ay door weyn ku leeyihiin waaxd/qaybta biyaha iyo fayadhowrka sababta oo ah waa kuwa ugu badan ee isticmaala, ilaaliya, maareeya khayraadka biyaha.
- ii. Ka-qaybgalka ay rag iyo haweenba ka-qaybgalaan go'aamada la qaadanayo, qorshaynta iyo hirgelinta maaraynta iyo kobcinta khayraadka biyaha ayaa la sii wanaajin doonaa iyada oo la adeegsanayo in si sharci ah loo dhiso guddiyada biyaha iyo fayadhowrka tuulada/bulshada.

Deeq-bixiyayaasha iyo Wada-hawlgalayaasha Horumarinta

- i. Horumarinta biyo-qaybinta iyo fayadhowrka waxaa ay u baahan tahay in maaliyad mug leh lagu maalgeliyo. Muddada dhow, maalgelinta noocaas ah waxaa ay Dawladdu ka heli kartaa oo keliya Ururrada Deeq-bixiyayaasha iyo La-hawlgalayaasha Horumarinta;

ii. Dawladdu waa in ay iskaashi la samaysaa la-hawlgalayaasha caalamiga ah ee horumarinta ayna hubisaa in la helo maaliyadda ay u baahan tahay qaybta biyaha iyo fayadhowrka. Tixgelin gaar ah ayaa la siin doonaa Qorshaha Horumarinta Qaranka;

iii. Dawladdu waa in ay hubisaa iskaashi iyo guulo wadajir ah (*synergies*) dadaallada horumarinta ee kaladuwan;

Ururrada Aan Dowliga Ahayn iyo Ururrada Bulshada Rayidka ah

i. Ururrada Aan Dowliga Ahayn (NGO-yada) ayaa sannado badanba door muhiim ah ku lahaa qaybtaWASH-ka ee Soomaaliya. Kaalinta ay ku leeyihiin qaybtaWASH-ka waxaa ay si weyn uga muuqataa deegaannada miyiga ah oo NGO-yo badan ay ka shaqaynayaan, ayna ku bixinayaan noocyo kala duwan oo adeegyada biyaha iyo fayadhowrka ah.

ii. Dawladdu waxaa ay iyada oo u maraysa IMWSC si dhow NGO-yada ugala shaqayn doontaa Horumarinta qaybtaWASHka si loo sii wanaajiyo doorka ay NGO-yada iyo Ururrada Bulshada Rayidka ay ku leeyihiin waxqabadyada biyaha iyo fayadhowrka.

iii. Si gaar ah, Dawladdu waxaa ay NGO-yada jooga Soomaaliya ka codsan doontaa in ay si taaba-gal ah gacan uga siiyaan fulinta waxqabadyo kala duwan oo la xiriira biyo-qaybinta, fayadhowrka iyo nadaafadda, oo ay ka mid yihiin;

☐ Tababaridda iyo karti-dhiska

☐ Gacan ka siinta bulshooyinka qorshaynta iyo hirgelinta mashaariicda biyaha iyo fayadhowrka

☐ Bixinta waxbarashada caafimaadka, nadaafadda iyo fayadhowrka, iyo

☐ Maaliyadsiinta mashaariicda biyaha iyo fayadhowrka.

Qoysaska/Reeraha

i. Mas'uuliyadda aasaasiga ah ee helidda biyaha iyo fayadhowrka ee qoyska/reerka waxaa ay saaran tahay qoyska/reerka laf-ahaantiisa, waxaana dhammaan waxqabadyada dawladda heerarkeeda kala duwani ay la halmaalaan aasaasi ahaan doorka ah in ay fududeeyaan arrintan, ama ay qabtaan hawlaha ay qabashadoodu hufan tahay marka lagu qabto heer bulshado, degmo ama qaran.

ii. Qoysaska/reeraha waxaa ku waajib ah in ay ka soo baxaan mas'uuliyaddan.

Ganacsiga Gaarka Loo Leeyahay

i. Danta laga leeyahay Siyaasaddan waa in markasta oo ay suuragal tahay la kordhiyo doorka ganacsiga gaarka loo leeyahay uu ku leeyahay horumarinta iyo bixinta adeegyada biyo-

qaybinta iyo nidaamka maaraynta qashinka noocyadiisa kala duwaniyo waxqabadyada fayadhowrka.

- ii. Sii wanaajinta adeegyada biyaha iyo fayadhowrka looma arki karo in ay tahay mas'uuliyad ay Dawladda oo keliya leedahay. Inkasta oo badi sii-wanaajinta biyo-qaybinta iyo fayadhowrka u baahan karaan taageero mug leh oo ay ka geystaan Dawladda iyo hay'adaha, haddana waxaa loo danlahaan in marka ay hawlahaasi qabanayso ay wada-hawlgeli doonaan hay'adaha maamulka iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay.
- iii. Waxyaabaha uganacsiga gaarka loo leeyahay ay kaga qaybgeli karaan waxa ka mid ah, laakiin kumaxaddidna:
 - ☐ Nakh-shadaynta mashruuca iyo kormeerka qandaraaska
 - ☐ Qodista ceelasha riigga iyo dhisidda biyo-xireennada, berkadaha, iwm
 - ☐ Dhisidda, hawlgelinta iyo dayactirididatas-hiilaadka sida bullaacadahaiyo musqulaha dadwaynaha ka dhexeeya.
 - ☐ Tababaridda iyo karti-dhiska
 - ☐ Keenista agabka iyo qalabka loo baahan yahay
 - ☐ Cilmi-baaris lagu sameeyo sii-wanaajintatas-hilaadka iyo hababka loo helo biyaha iyo fayadhowrka
 - ☐ Bixinta adeegyada la-talinta ah/*consultancy*
 - ☐ (caawimaad dhinaca farsamada ah)
 - ☐ Korjoogtayn iyo qiimayn
 - ☐ Maaliyadsiinta mashaariicda
 - ☐ Qaybinta iyo soo-ururinta lacagaha adeegga biyaha iyo ururinta qashinka
 - ☐ Maaraynta tubbooyinka goonida u taagan ee biyaha laga dhaansado

QAYBTA 4AAD

DIB-U-EEGISTA SIYAASADDA

Siyaasaddan waxaa dib-u-eegis lagu samayn doonaa muddo ka dib si loo daraaseeyo horumarka la xaqiijiyay iyo si wax looga qabto culaysyada cusub ee soo kordha. Sidaas, ayaana haddii loo baahdo loogu samayn karaa wax-ka-beddelka ku habboon, oo istiraatiijiyadaha iyo Maalgelintana wax looga beddeli karaa si ku habboon.
